Guri ku Dhibaatayn

Hage ku wajahan Daweyn Madani ah
iyo Ganaaxyo Denbi galid

February 2003 (reprinted March 2007)

Domestic Violence
A guide to civil remedies and
criminal sanctions

Somali

Ka Kooban Yahay

Araar	**3**
Horudhac	**4**
QAYBTA 1 - DAWEYN MADANI AH	**7**
Qeybta IV ee Sharciga xeerka Qoyska ee 1996	**7**
Sharciga ka Ilaalinta Dhibaatada 1997 (madani)	**22**
Sharciga Lammaanta Madani 2004	**24**
Sharciga Guri ku Dhibaataynta, Denbiga iyo Dhibbaneyaasha 2004	**25**
QAYBTA 2 - CARRUURTA	**26**
Sharciga Carruurta 1989	**26**
Sharciga Korinta ilmo aadan dhalin iyo Caruurta 2002	**26**
Sharciga Carruurta 2004	**26**
Sharciga Carruurta iyo Korinta ilmo aadan dhalin 2006	**27**
QAYBTA 3 - GANAAXYADA DENBIILE	**29**
Sharciga ka Ilaalinta Dhibaatada 1997 (danbi galid)	**40**
Sharciga Guri ku Dhibaataynta, Denbiga iyo Dhibbaneyaasha 2004	**41**
QAYBTA 4 - WIXII QODOBBO KALE KHUSEEYA	**43**
Sharciga Guryaha ee 1996	**43**
Qorshooyinka Meesha lagu magan galo	**43**
Sharciga Haajiraadda iyo Sanduuqyada Dawladda	**43**

Sharciga Dib u habaynta Booliiska 2002 - dhibaataynta qoyska iyo caafimaadka **44**

Sharciga Tacliinta 2002 **45**

LIFAAQA A - YUU YAHAY QOFKA WAX LA WADAAGA? **46**

LIFAAQA B - ARIMO GAAR AH OO LOOGU TALOGALAY MARKHAATIYALKA JILICSAN AMA LA CABSI GELIYEY **49**

LIFAAQA C - ERAYO U TAXAN SIDA XURRUF ISKU XIGTA **50**

LIFAAQA D - ILAHA TIXRAACA IYO DARAASOOYIN DHEERAAD AH **56**

ARAAR

HMCS waxay ku faraxsan yihiin in ay soo saaraan nuskhaddan la cusboonaysiiyey ee Hagaha markii ugu horraysay la soo saaray 2003dii. Waxuu Hagaha cusub muujinayaa isbeddellada, ka midka ah, waxyaabaha uu keenay Sharciga Guri ku Dhibaataynta, Denbiga iyo Dhibbaneyaasha 2004.

Waxaannu weliba soo saarnay DVD magaciisu yahay '*You Don't Have to Live in Fear*' (Uma Baahnid in Aad Cabsi ku Noolaatid). Waxay ujeeddada filinku tahay in uu waraysiyo iyo jilis fahan ugu siiyo dadka iyagu maxkamadaha qoysaska ka codsanaya amarro reebitaan oo madani ah. Waxaa kaloo uu isku wadaa in uu bixiyeyaasha adeegga tuso heerka ay gaari karto saamaynta ay guri ku dhibaatayntu ku leedahay shakhsiga iyo qoyskiisa iyo noloshiisa bulsheed.

Waxaannu rajaynaynaa in ay ilahan tixraacu wax sii tari doonaan qof kastoo laantan kaga hawlan bixinta adeegga iyo tababbarka.

Guri ku dhibaatayn waxay saameeyaan ayna dhaawacaan qoysas dhan oo ka mid ah dhammaan qaybaha bulshada. Natiijooyinka ka dhashana aad ayey u qoto dheeraadaan, iyagoon ku koobneyn qoysaska ay khuseyso, balse bulshada gebi ahaanba. Waxaanu dhaammaanteen xanbaarsannahay maal iyo cawaaqibka ku danbeyso – cawaaqibkaas oo aan ku koobneyn hantida dadweynaha, laakiin la xiriira, iyadoo ay ka sii muhiim tahay, natiijooyinka bulsheed ee uga soo ifbaxa dhibanaha, gaar ahaan caruurta kuwaasoo hoos u dhac dugsi iyo bulsho ka bixid ay uga iman karaan ku noolaanshaha dhibaataynta qoyska. Iyadoo lagu jiro qarnigii kow iyo labaatanaad waa wax laga argagaxo in asbuuc kasta, ay laba haween ahi u dhintaan natiijooyin ka dhashay dhibaateynta qoyska, iyo in dhibaatooyin qoys ku yimaada lagu qiyaaso 17% marka laga hadlaayo dhammaan falal danbiyeedyada dhaca.

Bulsho ahaan waa in aynaan u dulqaadan dhaqamada noocaas oo kale ah waana in aynu sii wadnaa inaanu fariimo caddaan ah si isku mid ah ugu dirnaa dhibanayasha iyo xadgudbayaashaba, fariimahas oo ah in rabshadaha qoyska aan la dhayalsan. Laakiin waa in aynu wax badan qabanaa – weynuna qaban. Waxaan u baahanahay in sare loo qaado feejignaanta dadweyanaha; la kaalmeeyo dhibanayaasha si ay u helaan taakulaynta iyo waxqabadka ay u baahan yihiin; in la fisho in xirfadlayaashu ay yihiin kuwa aad loo carbiyey fahmadna leh; waana in aynu hubinaa in nidaamyada maxkamaduhu ay kaalmeeyaan dhibanayaasha. Dawladda gudaheeda barnaamij shaqo ayaa la horumarinayaa si loo taabageliyo arimahan dhammmaantood. Waxaanuna mas'uuliyad gaar ah iska saareynaa sida uu nidaamku ula dhaqmo dadka ay dhibaatooyinku ka soo gaareen dhibaateynta qoyska. Waxaanu doonaynaa inaanu hubino in dhibanayaasha dhibaateynta qoysku ay helaan dariiqooyin saameyn leh oo fudud oo ay u maraan badbaado iyo in xadgudbayaasha lasoo hor joojiyo sharciga.

Maarso 2007

Horudhac

Hagahani wuxuu muujinayaa daaweynta madaniga ah iyo ganaaxyada danbiile ee ay ka heli karaan dhibanayaasha rabshadaha qoysku maxkamadaha waqtigan waxaana ku jira qodobbada Sharciga Guri ku Dhibaataynta, Denbiga iyo Dhibbaneyaasha 2004 ee hadda hawlgala iyo kuwa hirgeli doona laga bilaabo 1da July 2007da. Waxaana loogu talagalay adeegayaasha sharciga waafaqsan iyo kuwa iskood isu xilqaama kuwaasoo ka shaqeeya saameynta ay geystaan rabshadaha guryuhu. Mana aha mid loogu tala galay in xubo ka tirsan dadweynuhu naftooda ku caawiyaan. DVD-ga la socda ee magaciisu yahay (Uma Baahnid in Aad Cabsi ku Noolaatid) waxuu caawin doonaa kuwa iyagu codsadeyaasha ka taageeraya hawlaha maxkamadda qoyska. Warbixinodheeraad ah oo ku saabsan hagista iyo qoraalo ayaad ku arki doontaa lifaaqa D.

Sidee baa loo qeexi karaa rabshadaha guryaha?

Ma jirto qeexid guud oo la wada aqbalsan yahay oo ah rabshadaha guryaha. Qoraalkii ku saabsanaa rabshdaha qoyska ee ay soo sareen guddigii loo xilsray arrimaha qoysku, wuxuu isticmaalay qeexitaanka soo socda:

"Hab kasta oo xadgudub ah oo ah xoog u sheegasho, galmo, ama maskax ahaan ee dhaca inta uu jiro xiriir qoys[1]. Inta badan xiriirku wuxuu ka dhaxeeyaa lammaaneyaal (isqaba, wada nool, ama siyaabo kale) amase lammaaneyaal hore".

Xadgudubka gurigu waxuu dhaafi karaa rabshadda dhabta ah ee jirka. Waxaa kaloo uu ka koobnaan karaa xadgudubka shucuureed, burburinta alaabta, ka goynta saaxiibbada, qoyska ama ilo kaloo suurogal ah in taageero laga helo, xukunka helintaanka lacagta, alaabta gaarka ah, cuntada, gaadiidka iyo telefoonka, iyo daba socodka. Rabshadda waxaa badi arki doona carruurta waxaana isku xirmi kara xadgudubka dumarka loo geysto iyo xadgududbka (jirka iyo galmada) ee carruurta loo geysto. Waa in la aqoonsado saamaynta daran ee ballaaran ee ku noolaanta dhibaataynta qoysku ay ku leedahay carruurta in ay tahay arrin la xiriira ilaalinta carruurta. Waxay taasi la xiriirta hoos u dhaca dugsiyeed, bulsho ka bixidda iyo denbiga carruurnimada, isticmaalka mukhaadaraadka, dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda iyo guri beelka ka yimaadda guri ka cararka. Waxaa la og yahay in dhibaataynta qoyska iyo xadgudubku ay weliba ka muuqan karaan falalka xubnaha qoyska ee dhow ama fog marka ay la yimaaddaan waxqabadyo sharci darro ah sida guurka khasabka ah, waxa loo yaqaanno 'denbiyada sharafta' iyo 'caadooyinka dhaqameed ee waxyeellada leh' sida gudniinka gabdhaha. Xubnaha qoyska ee fogi waxay taageersanaan karaan ama gacan ka geysan karaan xadgudubka socda.

Natiijooyinka Sahaminta Denbiga Ingiriiska (British Crime Survey)[2] ayaa muujinaya in inta ugu badan dhibaateynta qoyska ay raggu u geystaan dumarka. Hagahan dhexdiisa waxaan isticmaalaynaa ereyo aan jinsiba raacsanayn marka aan ka hadlayno dalbadaha, dhibanaha, eedaysanaha, danbiilaha iyo/ama xadgudbaha. Si kastaba ha ahaatee waan qirsanahay in nimanka iyo lammaaneyaasha lab ama dhedig ahiba ay si isku mid ah u noqon karaan dhibaneyaal dhib ka

[1] *Xubnaha qoysku* waa hooyada, aabbaha, wiilka, gabadha, walaalka, walaasha iyo awoowga iyo ayayda, haddii ay si toos ah ugu xiran yihiin, xididka ama qoyska kale ee aabbaha ama hooyada

[2] Finney, A. Domestic violence, sexual assault and stalking (Dhibaataynta qoyska, weerarka galmada iyo daba socodka): natiijooyinka Sahamintii Denbiga Ingiriiiska ee 2004/2005. Warbixinta Internetka ee Wasaaradda Gudaha (Home Office) 12/06.

soo gaarey Dhibaateyn qoys. Macluumaadka halkaan ku qoran waxaa loo adeegsan karaa labada lab iyo dhedig labadaba jihada kaste ee galmada iyo dhaqamada dhammaantood. Waxaannu marka ay suurogal tahay, carrabka saarnay baahida loo qabo in la xigsado adeegyada takhasus leh kuwaasoo qaarkood ay ku taxan yihiin ilaha tixraaca ee Lifaaqa D.

Waa maxay daaweynta iyo ciqaabaha (ganaaxyada) la hayo?

Fursado dhowr ah ayaa laga heli karaa maxkamadaha, dariiqooyinka kala duwan oo ay maraan waxay ku xiran tahay isirro kala duwan, waxaana ka mid ah:

- Qaabka iyo heerka dhibaatooyin ama dhibaatada la gaystay
- Xiriirka qoys ee ka dhaxeeya lagu xadgudbaha iyo xadgudbaha.
- Saamaynta maaliyadeed, sida, u qalmista gargaarka sharciga (legal aid)
- Dhibaato culus oo caddeynta ah ee ay u baahan yihiin maxkamadaha danbiyadu marka la barbardhigo maxkamadaha madaniga. (markii danbi la guda galo, kiiska waa in loo cadeeyaa in ka qoto dheer wax shaki abuuri kara, laakiin dacawdaha madaniga ah, maxkamaddu waxay go'aan ku gaareysaa iyadoo eegaysa waxyaalaha suuragal noqon kara ee danbi galid cadeynaaya.
- Rabitaanada badbaade ee ku saabsan ilaalada uu sharciga uga baahan yahay; iyo
- Ilaalada dhabta ah iyo tan la maleynaayo ee uu sharcigu bixin karo marka runta laga hadlo, iyo sidoo kale helitaanka adeegyo taakulayn ee ku haboon.

Qeybta 1 ee Hagahan waxay sharaxeysaa talaaboyinka ay dhibanayaasha dhibaateynta qoysku sameyn karaan si ay uga yool gaaraan iyagoo maraaya fal madani ah oo ka dhaca maxkamadaha xaafadda, maxkamadaha Kiisaska Qoyska (Falal danbiyeedyada yar yar) ama Maxkadda Sare.

Qaybta 2aad waxay qeexaysaa qodobbada lagu maamulo kiisaska ku saabsan dhibaataynta qoyska ee hoos timaadda kiisaska xiriirrada lala yeesho ilmaha / deganaanshaha ilmaha.

Qeybta 3 waxay sharaxeysaa ganaaxyada la heli karo iyadoo la sii maraayo maxkaadaha denbiyada, oo ay ku jiraan kuwa Falal denbiyeedka yar yar iyo Maxkamdaha ay qaadiyaddu go'aamiyaan kiisaska..

Qaybta 4 waxay qeexaysaa qaar ka mid ah shuruucda kale ee weliba saamayn kara dhibbaneyaasha iyo dambiileyaasha dhibaataynta qoyska, sida qodobbada la xiriira guryeynta.

QAYBTA I: DAWEYN MADANI AH

Sharci dejin

Waxaa jira shan xeer oo wax ka qabta heerarka kala duwan ee Dhibaateyn qoys marka laga hadlaayo maamulka caddaalada madaniga ah.

- Qeybta IV ee xeerka Sharciga Qoyska 1996
- Sharciga ka ilaalinta dhibaatada 1997 (madani) kaasoo wata ganaaxyo danbiile
- Sharciga Caruurta 1989
- Sharciga korinta ilmo aadan dhalin iyo caruurta ee 2002
- Sharciga Carruurta 2004 (CA 2004)
- Sharciga Guri ku Dhibaataynta, Denbiga iyo Dhibbaneyaasha 2004[3] (Sharciga DV 2004)
- Sharciga Lammaanta Madani 2004 [CPA 2004]
- Sharciga Carruurta iyo Korinta ilmo aadan dhalin 2006 (ChAA 2006)

Hoos waxaanu kusoo bandhigeynaa bixinta daaweynta madaniga ah ee ugu waaweyn ee hoos yimaada xeer walba waxaanuna bixinaynaa hagis ku saabsan sida looga ka gungaaris ficil waxqabad gaar ah.

QEYBTA IV EE XEERKA SHARCIGA QOYSKA 1996

Qeybta IV ee xeerka Sharciga Qoyska 1996 wuxuu bixiyaa daaweyn madani ah oo loogu talogalay kufsiga, rabshado iyo guri kala wareegid. Ujeedadiisuna waxaa weeye in la ilaaliyo dadka ay horay usoo martay dhibaato qoys iyadoo usoo martay xiriir qoys. Waxaa jira shuruudo adag oo ku saabsan yaa dalban kara amarka lagu bixiyo inuu qof ka fogaado falalka qaar ama dalab hanti la wareegis si ay u badbbaadiyaan naftooda iyagoo adeegasanaaya xeerkan; kuwaas oo hoos lagu muujiyey.

Iyadoo la adeegsanaayo Qeybta IV ee xeerka Sharciga Qoyska 1996 maxkamaddu waxay bixin kartaa amarro hanti la wareegis ah iyo kuwa ah inaan galmo la isku sameyn karin si codsadaha looga ilaaliyo eedaysanaha (qofka uu amarka reebitaanku khuseeyo). Waxaa weliba jirta awood ay maxkamaddu ku leedahay Kiisaska Qoyska - ee uu eedaysanuhu qayb ka yahay - in ay ka soo saarto amar faraxumaynta horjoogsanaya, haddii xataa aanan si rasmi ah loo codsan amarka iyo haddii ay maxkamadda la habboon tahay in mid loo soo saaro danta qofka kale ama ilmaha awgeed.

[3] qodobbada 1 – 4 ayaa wax ka beddelaya Sharciga xeerka Qoyska 2006

Amarka hanti la wareegistu wuxuu xukminaayaa in lala wareego guriga ay wadaagaan labo qof iyo ilmahooda si loo ilaaliyo hal qolo ama ilmaha iyadoo laga ilaalinaayo qoys dhibaateyn. Amarku wuxuu ka reebi karaa xadgudbe guriga si joogto ah ama wuxuu qaybin karaa guriga si looga reebo isaga/iyada qayb guriga ka mid ah. Haddii uu danbiile mar hore guriga ka tagay, waxaa laga yaabaa in amar hanti la wareegis ah la bixiyo si isaga/iyada looga celiyo inuu guriga soo galo iyo/ama inuu guriga usoo gaaro masafo la yaqaan.

Waxaa jira noocyo fara badan oo ah amar hanti la waregis (eeg hoos) laakiin kuwa ugu caansani waxay sheegayaan inay waajib ku tahay danbi lagu soo oogaha inuu ka tago guriga dadka is haystaa ay ku jiraan, iyo haddii uu ka tagay guriga waxaa waajib ku ah inaanu soo gelin ama isku dayin inuu soo galo guriga, ama oo usoo jirsado masaafo loo xadiday. Amarka waxaa kaloo ku jiri kara ogeysiis balamo maxkamadeed oo dheeraad ah iyo mudada amarkaasi uu ku dhammaanaayo. Guud ahaan mudada amaradani waa inta u dhaxaysa lix bilood iyo hal sano, laakiin waxay noqon karan ‘ilaa amar danbe’. Mararka qaar waxaa amarka loo kordhin karaa oo keliya hal muddo oo lix bilood ah, tusaale ahaan, marka uu codsaduhu guriga qofka kale kula jiro ama hore ugula jiray, isagoon kaas dan ka rabin.

Ka hor intaysan go’aan gaarin maxkamaddu waxay adeegsan doontaa tijaabada ‘dheelitirka waxyeelada’ taasoo ay ku jirto fikradda ah waxyeelo muuqata. Tani waa tijaabo lagu ogaanaayo qofkii iyo/ama cunugee iyaga la degan ayaa khatarta ugu wayni soo gaareysaa haddii amar la bixiyo, ama aan la bixin. Haddii ay maxkamaddu adeegsato tijaabada dheelitirka waxyeelada, si ay ugu danayso xaasas isqaba/lammaane ama xaasas hore isu qabi jirey/lammaane hore, waxay leedahay waajibaad khasab ah inay amar bixiso, maxkamaddu waxaa kale oo ay qiimaynaysaa duruufaha qoyska ama qolada iyadoo loo eegaayo **‘**arimaha iyaga la xiriira’ kuwaasoo lagu soo bandhigay faqradda 33(6) ee xeerka qoyska. Kuwaasi waxay noqon karaan kuwo aad u adag in la fahmo maadaama uu Sharcigu kala saarayo, xaasaska, kuwa iyagu xaq u leh degganaanshaha iyo dadka qofka la deggan ee aan xaq lahayn

Amarka faraxumayn ka reebis waxaa loo isticmaalaa in lagu joojiyo qof inuu sameeyo ama ku handadado rabsho dacwo oogaha ama wax caruur ah inuu farxumeeyo. Xeerku ma qeexaayo faraxumayn laakiin waxaa ku jiri kara cabsi gelin, dhibid, hanjabaado iyo waxyeelo kale. Erayada dhabta ah ee uu xanbaarsan yahay amarka faraxumayntu waxay ka mamnuucaan danbi lagu soo oogaha inuu isticmaalo rabsho cabsi gelin ah uu ula jeedo danbi soo oogaha iyo inuu amro, dhiirrigeliyo, ama si uun u soo jeediyo inuu qof kale sidaa yeelo. Waxaa kaloo ku jiri kara in laga mamnuuco denbi lagu soo oogaha inuu cabsigeliyo, waxyeelo, ama dhibaateeyo danbi soo oogaha iyo inuu amro, dhiirrigeliyo, ama si uun u soo jeediyo inuu qofkale sidaa yeelo. Erayadani waxaa sidoo kale loo isticmaalayaa in lagu ilaaliyo wixii caruur ah ee lagu xusay danbi soo oogista iyadoo lagaga ilaalinaayo denbi lagu so oogaha.

Ilaalinta caruur laga ilaalinaayo dhibaateyn, ama hanjabaad rabsho, waxaa loo adeegsanaayaa ‘ilmo walba oo la xiriira’ ilamaha la xiriira waxaa lagu qeexi karaa sidatan:

- Ilmo walba oo la filaayo inuu la noolaado mid ka mid ah labada qof ee is haya.
- Ilmo walba oo soo hoos gelaaya korinta ilmo aadan dhalin ama hawlgalka xeerka ilamaha; iyo
- Ilmo kale oo kasta kaasoo maxkamaddu arintiisa muhiim u aragto.

Shuruudaha u yaal cidda dalban karta amar hanti la wareegis, iyo noocyada amarada kuwaasoo maxkamaduhu sameyn karaan, way ka adag yihin kuwa la xiriira faraxumeyn ka reebista hoos ayaa amaradan si qoto dheer looga hadli doonaa. Haddii aad dalbatay amar faraxumeyn ka reebis ah waxaad kaloo awoodi kartaa inaad dalbatid amar hanti la wareegis ah, adigoo isticmaalaaya isla arjigii (form), inta kiiskaagu soo buuxinaayo shuruudaha looga baahan yahay.

Amarada waa mid uu “ogeysiis la socdo” iyo “midaanu la socon”. Erayadan hoos ayey ku sharaxan yihiin.

Dalbasho amaro farxumeyn ka reebis iyo hanti lawareegis

Yaa dalban kara?

Liis ay ku jiraan cidda xaqa u leh inay daalbadaan amarada faraxumeyn ka reebis iyo hanti la wareegis kuwaasoo hoos yimaada qaybta xeerka Sharciga Qoyska ee 1996 waxay ku yaaliin lifaaqa A. Sharcigu waxaa weeye in xaq-u-yeelashada lagu saleeyo isutagga xiriir qoys iyo/ama wad noolaansho.

Haddii uu dalbaduhu ka yar yahay 18 sano kana weyn yahay 16 sano waxaa looga baahan yahay inay leeyihiin saaxiib ku dhow, oo ku kaalmeeya dalbashada.

Xaggee laga helaa amarada

Arji dalbasho ayaa loo sameynsan karaa mid ama labadan amarba iyadoo laga sameynaayo amarka maxkamad walba oo xaafadeed oo leh maamulka cadaaladda qoyska, ama maxkamadaha denbiyada yar yar taasi waxay kaloo tahay maxkamad wax ka qabta arimaha qoyska. Waa in ay dalbadeyaashu ogsoonaadaan, horumarinta Adeegga Qoyska Midaysan (Unified Family Service) awgeed, waxaa ka suurogal badan in codsiga noocaas ah wax looga sii qaban doono xagga FPC, maxkamadda wax ka qabaa arimaha qoyska.

Gaar ahaan kiisaska adag ee ka bilowda maxkamadaha wax ka qabta arrimaha qoyska waxaa mar marka qaarkood loo gudbiyaa maxkamadaha xaafadda. Waxaa kaloo jira dalbashada nooc ka mid ah oo lagu dalbanaayo hanti la wareegis oo aanay xalin karin FPC, maxkamadda wax ka qabata arimaha qoyska.

Sida loo dalbado

Dalbadayaashu waxay qabsan karaan garyaqaan (iyagoo doorbidaaya khibrad u leh hawlaha dhibaateyn qoys[4]) inay maxkamadda u smeystaan dalab toos ah. Haddii garyaqaan la qabsado qaali ayey noqon doontaa in kiiska maxkamad la hor keeno haddii uusan codsadu u qalmin maalgelinta dawladda.

Ma jiraan wax xaddidaad ah oo ku saabsan inaad qof ahaan u dalbatid (ama qof kale adoo u hadlaya) laakiin haddii uu dalbaduhu sameeyo sidan, waa in ay diyaar u yihiin inay shaqsi ahaan buuxiyaan araajida loo baahan yahay iyo bayaano (statements), ayna ku sharaxaan kiiskooda maxkamadda horteeda. Shaqaalaha maxkamadu way ku caawin karaan iyagoo kuu sharaxaya nidaamyada maxkamadda, laakiin ma ay bixin karaan talo sharci ah oo ku saleysay abaalmarinadda kiisaska keligood ah, ama ma bixin karaan talo ku saabsan natiijida laga yaabo inay soo baxdo. Si kastaba ha ahaatee kaalmeyn iyo warbixino dheeraad ah ayaa laga heli karaa ururo kaalmo oo iskaa wax u qabso ah (iskood isu xilqaama)[5] sida ilaalada deeqda dumarka xaafadda ama adeegyada ay bixiyaan kooxaha wax caawiya, kaalmeynta dhibanaha. Ururadani waxaa laga yaabaa inay soo jeediyaan meelaha laga heli karo talo sharci ah laakiin sida badan iyaga naf ahaan toodu ma bixiyaan talooyinkaas.

Maxay howshu igu qaadanysaa?

Waqtigan xaadirka ah qiimaha aad kaga helaysid maxkamadaha qaynuunka Sharciga Qoyska waxaa weeye £40- wax lacag ah oo la bixinaayaa ma jirto haddii aad ka sameysatid arjigaaga maxkamadaha denbiyada yar yar. Wixii araaji (forms) ah ee ku xiga ee la sameeyo ee hoos imaanaaya xeerkani waa £40. Dalbadayaasha go'aansada inay iskood isu-deberaan waa inay bixiyaan qiimahan markay dalabkooda soo gudbinaayaan. Si kastaba ha ahaatee waxaa laga yaabaa in laga reebo ama laga dhimo qiimaha ay bixinayaan- sida ku sharaxan qoraalka adeegyada maxkamadda EX160 A[6], *lacagaha maxkamadaha waajib ma kugu tahay inaad bixiso?.*

[4] Ururka Resolution – waxay leeyihiin guddi ka kooban Looyarro Takhasus leh oo u aqoonsan xeerka Xadgudubka Guriga. Waxaad baari kartaa boggooda internetka oo ah www.resolution.org.uk. Waxay natiijooyinku muujin doonaan looyarrada ama tababbarteyaasha looyarnimada iyo kaaliyeyaasha sharciga waxayna muujin doonaan in ay ka mid yihiin khuburiinta Resolution ee takhasus leh ama dhex-dhexaadiyeyaasha Resolution.

[5] Bixiyaha kaste ee adeegga ee qof u gudbinaya adeeg kale waa in uu tixgeliyo baahiyihiisa gaarka ah waana in uu bartilmaanto adeegyada takhasus leh markay suurogal tahay ee daboolaya baahiyaha gaarka ah, sida adeegyada BME (Jinsiyadaha Madowga iyo kuwa Laga tira badan yahay).

[6] (qoraal) http://www.hmcourts-service.gov.uk/HMCSCourtFinder/GetLeaflet.do?court_leaflets_id=172 / (codsi) http://www.hmcourts-service.gov.uk/HMCSCourtFinder/GetForm.do?court_forms_id=168

Sarkaal ka shaqeeya maxkamada ayaa kaa baajin doona lacagaha haddii aad buuxisid mid ama in ka badan shuruudaha soo socda:

- Dalbadaha ama lammaanuhu ay qaataan lacagaha ay dowladdu bixiso ee lagu kaalmeeyo dadka dakhliga yari soo galo ama aanu dakhliga soo gelin;
- Dalbaduhu uu qaato guno shaqo raadiyaha;
- Dalbaduhu uu qaato Gunnada togan ee Canshuurta Shaqada (Working Tax Credit);
- Dalbadaha iyo lammaankeedu ay qaataan lacagaha ay dawladdu siiso dadka dakhliga yari soo galo ama aanu dakhliba soo gelin, ama dakhliga ku salaysan lacagaha loo ogol yahay shaqo raadiyeyaasha, canshuur dhaafka qoysas shaqeeya iyo haddii dalbaduhu uu helaayo 'kaalmada sharci ah'. Iyo inay ku lug leeyihiin kiis madani ah, ama
- inay ku lug leeyihiin kiis qoys ayna helaayaan kaalmo sharci ah.

Dalbadeyaasha qabsada garyaqaan (qareen) waa inay ogaadaan inay iska bixin karaan kharajka maxkamadda iyo kan garyaqaankaba. Dalbadeyaashu waxaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan taakulayn taasoo ay ka helayaan maalgelinta adeegyada maxkamadeed ee beesha (oo horay loogu aqoon jirey deeqaha dawladdu ay siiso dadka aan iska bixin karin kharajka garyaqaanada 'Legal Aid'). Si ay tan xaq ugu yeeshaan waxaa waajib ku ah inay ka gudbaan tijaabo xagga dakhliga ah oo khasab ah waxaa kaloo waajib ku ah inay muujiyaan sababo iyo ujeedooyin macquul ah oo kiiskan ay ugu guulaysan karaan.

Ma jiraan kaalmo maaliyadeed si aan kiis uga natiijo gaaro?

Kiisaska oo dhan waxaa lagu go'aaminaayaa duruufaha iyo mudnaanta goonida ah waxaana loo fiiriyaa shuruudaha ku qeexan xeerka maalgelinta ee u yaal gudigga adeegyada maxkamadaha. Xeerka maalgelinta waxaa weliba hoos imanaysa hagis - hagista go'aan gaarista. Marka laga hadlaayo kiis dhibaateyn qoys oo deg deg ah oo lagu dalbanaayo amar fal ka reebis ah, garyaqaan qandaraas la leh guddiga ayaa isticmaali kara awoodaha la siiyey si uu u bixiyo shahaado deg deg ah oo caddeynaysa in sharci ahaan lagu matali karo si loo hubiyo in matalaadda loogu baahan yahay codsigaasi aysan dib u dhicin.

Sida ay rabaan Shuruudaha yaalla, waa in rajada helitaanka amarku aysan liidan, faa'iidooyinka suurogalka ah in uu macmiilku kiisaska ka helana waa in ay ka sabab bixiyaan kharashka suurogalka ah, marka la eego rajada helitaanka amarka la rabo iyo duruufaha kale dhammaantood (Shuruudda 11.10).

Inkastoo ay labada dhinacba xaq u yeelan karaan maalgelinta dawladda tuhunsaneyaasha (dambiileyaasha/eedaysaneyaasha) way u suurogal yar tahay in ay shuruudaha buuxiyaan, gaar ahaan marka codsiga la gudbinayo uu ku saabsan yahay oo keliya amar horjoogsanaya faraxumaynta.

Marka laga hadlayo kiisaska dhibaataynta qoyska, hagista Xeerka maalgelintu waxay dhigaysaa in uu codsadaha maalgelintu macneeyo tallaabada uu Booliisku hore u qaaday iyo ilaalinta kale ee jirta, haddii ay jirtaba. Caadi ahaan ma habboonaan doonto in

maalgelinta dawladda la bixiyo marka ay jiraan shuruudo damiinasho oo la hoos imanayo oo codsadaha lagu ilaalinayo haddii aanan dhawaan kuwaaas laga joojin doonin ka dib go'aan ka soo baxay denbi oogid. Hase yeeshee taasi ma ah xeer adag waana in kiis kaste loo eego heerka ilaalinta ee codsaduhu uu ka helayo wixii kiis denbi ah. Waa in uu looyarka talo bixinayaa weliba muujiyo in uu tixgeliyey habboonaanta warqad digniin ah oo loo diro eedaysanaha ka hor inta aanan maxkamadda kiiska laga bilaabin ama in ay warqadda noocaas ahi halis gelin karto macmiilka.

Waa muhiim ah in la ogaado in guddigu uu ku go'aamiyo kiis walba iyadoo loo eegaayo qiimeyntiisa. Waa in ay looyarradu marwalba ku fikiraan in ay dalbadaan qarash ka bixin waana inay keenaan macluumad intay awoodi karaan, iyagoo macluumaadkaas ku saabsan kiiskooda u soo gudbinaaya guddiga. Markuu Hagahani soo baxaayey, dadkii qaadanaayey Taageerada Dakhliga (Income Support) ama Gunnada Shaqo Raadsadaha ee Dakhliga ku salaysan (Income-based JobSeeker's Allowance) si toos ayey xaq ugu leeyihiin inay helaan kalmo maaliyadeed. Haddii kale, dadku waxay helayaan kaalmada hadii dakhliga guud ee kusoo galaa uu ka yar yahay £2,350 bishii (heer dakhligooda oo intaan ka sareeyaa qabta haddii uu dalbaduhu leeyahay in ka badan afar caruur ah oo isaga nolol ahaan ku tiirsan), dakhliga lacagaha iskaa kuu soo hadha bishii oo ka yar £649 iyo hanti iskaa kuu soo hadhay oo dhan £8,000 ama in ka yar. Haddii dakhliga u soo hadha bishii u dhexeeyo £280 - £649, ama hantida usoo hadha ay u dhaxeyso £3000 - £8000, waa la siin doonaa qarash kiis ka bixin iyadoo laga sugaayo in ay wax ka bixiyaan lacagaha kaga baxaya maxkamadaha. **FIIRO GAAR AH (NB):** Xisaabahan mar kale ayaa dib loo eegi doonaa taasina waxay la socon doontaa sare u qaadista lacagaha ay dawladdu bixiso (agagaarka bisha Abriil sanad kaste).

Taas waxaa dheer, guddigu waxuu ikhiyaar u leeyahay in uu tirtiro xadka sare ee dakhliga kuu soo hadha ee £649 ah taasoo uu ugu danaynayo dhibbaneyaasha dhibaataynta qoyska ee maxkamadda ilaalin u soo doonanaya. Waxay tirtiriddaasi dabbakhantaa marka uu macmiilku rabo amar reebitaan ama mid kale oo lagaga ilaalinayo waxyeello ama eedaysanaha lagu xirayo sababtoo ah jebinta amarka noocaas ah. Hase yeeshee, lacagaha wax ka bixinta ah lama tirtiri karo sidaas darteedna wixii kiisaskan khuseeya lacagaha wax ka bixinta ah ee bishii waxay kor u dhaafi doonaan xadka sare ee lacagaha wax ka bixinta ah ee caadi ahaan hirgala. Xitaa haddii aanay jirin lacago looga baahan yahay hanti iyo/ama dakhli, 'qiimaha waajibka ah' ayaa lagugu yeelan. Waxuu macmiilku ka soo ceshan karaa ama ku dhowran karaa hantida ama lacagaha kiisaska la xiriira sida kiisaska wareejinta dheeraadka ah. Kiisaska noocaan oo kale ah kharajka looyarka ee macmiilka la maalgeliyey waxaa loo baahan yahay in laga bixiyo wixii hanti ama lacag ah ee usoo noqday ama uu keydsaday.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan maalgelinta dawladda waxaa laga heli karaa bogga internetka ee gudigga adeegyada maxkamadaha iyo CLS Direct (CLS Toos ahaan) (www.clsdirect.org.uk) halkaasoo laga heli karo buugyare lala soo bixi karo oo guudmaraya sharciga oo una habboon macaamiisha.

Waa maxay dalbasho la wargelinaayo?

Dalbasho la wargelinaaya waa marka dhammaan qaybaha is haya loo diro ogeysiis si ay maxkamad usoo hor istaagaan.

Markaad arji maxkamad buuxisid ama maxkamada arimaha qoyska:

- Waxaa la siinaayaa kiis lambar waxaana loo diiwaangelin doonaa in lagu qaado kiiska qaadiyada xaafadda ama qaadiyaal la soo uruuriyey, ama koox qaadiyo ah oo jooga maxkamadda danbiyada yar yar hortooda. Ballan ayaa la qaban doonaa wixii loo gaaro 24 saacadood ilaa afar asbuuc iyadoo loo eegaayo sida ay maxkamaddu mashquul u tahay iyo degdegga;
- Dalbasho la wargelinaayo waa in 'loo geeyaa[7]', macnaha, in gacanta laga geliyaa qofka dacwadda lagu soo oogay, tan waxaa sameynaaya dacwo oogaha ama cid matasha, muddo aan ka yeryn laba asbuuc maalinta dacwadda la qaadaayo (badanaa garyaqaanadu waxay adeegsadaan kiis adeegayaasha si ay tan u sameeyaan);
- Jawaab laga sugaha waxaa la siin doonaa arjiga FL401, qoraal kaalmo ah iyo arjiga FL402- ogeysiis caddeynaya maalinta dacwadda la qaadayo; iyo
- Marka jawaab laga suguhu u helo waraaqaha loo baahan yahay, dacwad ooguhu waa inuu uso gudbiyaa qoraal maxkamadda (arjiga FL415 ayaad ka heli kartaa maxkamadda, ama maxkamadaha qaabilsan arrimaha qoyska).

Waa maxay dalbasho aan la wargelineyn?

Kuwan waxaa weliba loo yaqaannaa dalbasho dacwad uu hal qof soo oogey. Waxaa la qaadaa iyadoo la ogeysiineyn dacwo lagu soo oogaha. (isagoo/iyadoo maqan). Qaabka loo dalbanaayo dalbashooyinka aan la wargeliney wuxuu la mid yahay kuwa dalbashada la wargelinaayo. Faraqa u dhaxeeya waxaa weeye oo keliya markay dacwad ooguhu maxkamadda yimaado si uu u sameeyo dalbashada, isaga ayaa hortegeysa qaadiyada isla maalintaaba. Qoraalkeeda dhaarta ah waa inuu kusoo daraa sababaha ay tahay inay maxkamaddu wax ka qabato dalbashada isagoon marka hore ogeysiin dacwad lagu soo oogaha.

Qeybta 45 ee Sharciga Qoyska 1996 ayaa sheegaaya ogolaansho sharci ah oo ku saabsan dalbashada aan la isa soo wargelineyn iyo talooyin ay maxkamaddu raaceyso markay go'aaminayso haddii kiiska la gelaayo ogeysiis la'aan. Waxay qeexaysaa arrimo hagaya ikhiyaarka maxkamadda marka ay ka go'aan gaarayso in ay xaq tahay oo ay habboon tahay in ay amar ku bixiso ogeysiis la'aan iyo haddii marka la eego dheelitirkii ixtimaal, ay jirto khatar waxyeelo[8] oo soo gaareysa dalbadaha (wixii caruur ah) haddii aan amar si deg deg ah loo sameyn. Haddii amar fara xumeyn reebis ama/iyo hanti la wareegis la sameeyo iyadoon ogeysiis jirin, maxkamaddu waa inay sameysaa ballan kiiska lagu dhegaysanaayo, si uu jawaab laga suguhu u helo fursad uu maxkamadda ku yimaado shaqsi ahaan.

[7] Waa in weliba codsiyada amarrada degganaanshaha qaarkood loo geeyo milkiilaha ama hantiilaha – fiiri xeerarka 3.8(11) iyo 3A(10).
[8] 'Waxyeellada' ka sii fiiri Qaybta II - Carruurta

Dalbashooyinka aan la wargelin badanaa waa la bixiyaa, laakiin haddii ay maxkamaddu mid diiddo (badanaa tani ma dhacdo), maxkamaddu waxay hubisaa in dacwaddaas la dhageysto si dhaqso ah badanaa asbuuc gudihiis ah. Amarada faraxumeyn ka reebista badanaa in la ogolaado ayey aad u sii badan tahay marka loo eego amarada hanti la wareegis. Mararka aad iyo aad degdeg u ah waxay maxkamaduhu fadhiisan karaan waqtiyada ka baxsan saacadaha caadi ahaan la shaqeeyo ama maalmaha wiikeendiga.

Sidee loo dalbadaa amarada faraxumeyn reebis[9]

Dalbaduhu waa inuu:

- Soo buuxiyaa arjiga FL401 (koobiyo ayaad ka helaysaa maxkamadda ama internetka www.hmcourts-service.gov.uk/HMCSCourtFinder);
- Sheegtaa xiriirka ka dhaxeeya isaga iyo jawaab laga sugaha (isagoo calaamadinaaya goobta ku haboon);
- Tilmaamaa si kooban, meesha loo baneeyey, daaweynta uu raadinayo;
- Soo buuxiyaa arjigaa C8 haddii uu dalbaduhu doonayo inay ka tagto cinwaankiisa markuu buuxineyo arjiga FL401- wax ogolaansho ah loogama baahna maxkamadda si tan loo sameeyo; iyo
- Soo gudbiyo qoraal dhaar ah oo uu ku kaalmeynayo badalashadiisa (kani waa inuu muujiyaa xaqaa'iqa ugu waaweyn ee kiiska, oo ay ku jiraan faahfaahin wixii falal danbiyeed ah iyo soo dhexgelis ay boolisku sameeyeen).

Iyadoo maxkamadda ogolaasho looga haysto, arjiga FL401 ayaa caddeyn afka ah lagu taakulayn karaa ka sokow. Kiisaska aad degdega u ah maxkamaddu waxay diyaar u tahay inay aqbasho dalabka iyadoo aanay jirin qoraal kaalmo ah, laakiin waa caado jirta inay maxkamaddu weydiiso dalbato inay soo gudbiso cadeymaheeda waqti kale.

Sidee bay amarada hanti la wareegistu uga duwan yihiin?

Sababo kala duwan awgood amarada hanti la wareegistu way ka adag yihiin kuwa faraxumeyn reebis, laakiin maadaama ay jiraan shan qaybood oo ka tirsan qeybta IV ee Sharciga xeerka qoyska ee 1996 oo ka hadlaaya arinta (qeybaha 33,35,36,37,38).

Bixinta amar waxay ku xiran tahay xiirka u dhaxeeya qaybaha is haya iyo haddii dalbaduhu hadda haysto xuquuq hanti la wareegis ah.

Waa muhiim in la ogsoonaado in dalbadayaashu ay raadiyaan amar hanti ka reebis kaasoo la xiriira guri ay deganaan jireen, deggan yihiin ama ay rabaan inay degaan dadka is qabtay. Tusaale ahaan amar looma sameyn karo haddii hantida loo iibiyey

[9] Foomamka maxkamadda waxaa laga heli karaa bogga internetka ee Adeegga Maxkamadaha ee Boqortooyada (HM Courts Service) oo ah http://www.hmcourts-service.gov.uk/HMCSCourtFinder/FormFinder.do codsiyada qaarkoodna internetka ayaa looga soo diri karaa halkan www.hmcourts-service.gov.uk/onlineservices .

ujeedooyin maalgelin ah.

Waa maxay noocyada amarada hanti la wareegistu?

Maxkamaddu waxay sameyn kartaa amaro badan oo kala duwan iyadoo loo eegaayo Sharciga xeerka qoyska 1996. Qaar ayaa halkan lagu soo liis-gareeyey si dalbadaha looga siiyo fikrad waxa uu filanayo. Amar ayaa:

- Ogolaan kara inuu dalbade deganaado guri ama qayb guriga ka mid ah;
- Mamnuuci kara in dacwad lagu soo ooge uu deganaado guriga ama qayb la yaqaan oo guriga ka mid ah;
- Ka dalban kara dacwad lagu soo oogaha inaanu ku soo noqon cinwaanka la sheegay (taariikhda iyo waqtiga la go'aamiyey);
- Ka dalban kara dacwalagu oogaha inaanu kusoo noqon cinwaanka la sheegay;
- Ka dalban kara dacwad lagu soo oogaha inuu ka saarin dalbadaha guriga:
- Ka dalban kara qoloda guriga la wareegaysa inay gurigaas daryeelaan;
- Sharciyeyn kara isticmaalista kuraasta, sariiraha, iyo maacuunta guriga taal oo dhan;
- Ka dalban kara dalbadaha ama dacwad lagu soo oogaha inay sii bixiyan lacagaha bilbisha loo bixiyo markad guriga gadatid (mortgage) ama kirada.

Amarada hanti la wareegista waxaa kaloo ku jiri kara ogeysiis ganaax ah, maxkamadduna waxay amri kartaa in lagu lifaaqo awoodda wax lagu xabiso (xiro) (eeg hoos). Si kastaba ha ahaatee maxkamaddu kuma soo lifaaqo karto awoodda wax lagu xabiso (xiro) si loo dhaqaaleeyo guriga, si loo bixiyo kirada, ama lacagaha bilbisha loo bixiyo markaad guriga gadatid (mortgage) ama mid khuseeya isticmaalka alaabada iyo maacuunta. Arimo ay sababayaan kala duwanaansho xagga sharciga ah, maxkamaddu ma ay qasbi karto bixinta kirada ama lacagaha bilbisha loo bixiyo markaad guriga gadatid.

Duruufaha aad iyo aad u daran marka lagu jiro dalbadayaashu waxay heli karaan iyagoon haysanin ogeysiis iyagoo raacaaya qaab la mid ah kan amarada faraxumeyn reebista oo kale. Haddii uu dacwad lagu soo ooge jebiyo amar hanti la wareegis ah, wuxuu dalbaduhu heli karaa sharciyada dhaqan gelinta, kuwaas oo la mid ah kuwa faraxumeyn reebis.

Yaa dalban kara amar hanti la wareegis ah?

Waxaa jira saddex nooc oo dad ah kuwaasoo dalban kara amar hanti la wareegis ah:

- Dadka loo ogol yahay (xaqa u leh)
- Kuwa aan loo ogoleyn iyo
- Dadka leh xuquuq guri oo uu guur keenay.ama xuquuqda Lammaanaha Madani.

Qofka "xaqa u lihi" waxa uu leeyahay xuquuq sharci ah oo uu ku deganaan karo guriga sidii isagoo mulkile ah oo kale, kireyste, ama ruqsad u hayste qandaraas wata. Qofka "aan xaqa lahayni" ma laha xuquuqdaas.

Nooca amar degganaansho ee uu dhibanaha rabshado guri dalban karo waxay ku xiran tahay inay tahay mid xaq u leh ama aan xaq u lahayn. Haddii aanay xaq u lahayn nooceeda dalbasho wuxuu ku xiran yahay inuu qabo (xaas ahaan) dacwad lagu so ooguhu. Dalbade xaq u lihi waa dalban karaa amar marka la eego qaybta 33aad ee Sharciga xeerka qoyska, meesha uu qofka aan xaq u lahayni uu dalban karo marka loo eego qaybaha 35,36,37, ama 38aad.

Qofka xaqa u leh ee dalbada amar hanti la wareegis ah, waa inuu muujiyaa in uu wax la wadaago dacwad lagu soo oogaha wax la wadaagistaasi ha ahaato guur, lammaan madani ama wada noolaansho. Liis qeexaaya wax la wadaagista ayaad ka helaysaa lifaaqa A.

Maxaan ka filan karaa dhegeysiga dacwadaha iyo amarada?

Dacwad dhegeysiyada ku saabsan farxumeyn ka reebista iyo hanti la wareegista, kuwasoo lagu dalbaday arjiga FL401 waxaa lagu qabtaa si khaas ah qololka, haddii ay maxkamaddu tahay tan xaafadda waxaa lagu qabtaa qolka qaadiga. Waxay kaloo ka dhici karaan maxkamadaha arrimaha qoyska, markan oo kale dadweynaha waa in laga reebaa qolka maxkamadda. Labada maxkamadood midkoodba waxay oggolaan karaan dad kale, tusaale ahaan, saaxiib ama la taliye madaxbannaan, oo taageero laga helayo. Dalbadayaasha waxaa looga baahnaan karaa inay bixiyaan caddeyn afka ah oo ay siinaayaan maxkamadda. Inta ay qaadaneyso dhegaysiga dacwaddu way kala duwan yihiin waxayna ku xiran tahay kiisku siduu u adag yahay, haddii uu dacwad lagu soo ooguhu muran ka qabo waxyaalaha lagu soo eedeeyey. Markey dhegeysato dacwadda ka dib maxkamaddu waxay awooddaa:

a) Inaysan kiiska waxba kasoo qaadin ama
b) Inay bixiso amaro ah faraxumeyn reebis/ hanti la wareegis; ama
c) Inay ogolaato ballanqaad uu sameeyey dacwad lagu soo ooguhu, hab ay heshiis ku yihiin dacwad oogaha iyo lagu soo ooguhuba laakiin waa in ay maxkamaddu ku qanacdo in ay taasi codsadaha siin doonto ilaalin ku filan.

Waa maxay “ballanqaad”?

Ballanqaadku waa fursad u ogolaanaysa, qeybaha ishaya inay xaliyaan mushkiladooda iyadoo aanu dhicin dacwad dhegaysi buuxa. Waa ballanqaad maxkamadda loo sheegayo inay dhacayaan waxyaalaha qaar ama aanay dhici doonin waxyalaha qaar. **Ma aha denbi qirasho.** Ballanqaadyada waxaa laga samayn karaa dacwadaha Maxkamadda Xaafadda ama Arrimaha Qoyska inkastoo ganaaxyada jebintu ay kaga duwan yihiin maxkamadda arrimaha qoyska. Maxkamad kastaaba waa in ay ballanqaadka ka aqbasho oo keliya dacwadaha marka ay ku qanacsan tahay in aysan taas halis ku jirin. Dacwad lagu soo oogaha ayaa sameyn kara ballanqaad isagoon qiranin waxyaalaha lagu soo eedeeyey. Sidaa daraadeed ballanqaad looma isticmaali karo dhegaysi dacwado danbi oo soo socda, iyadoo loo adeegsanaayo xukumis danbiile, ama

cadeyn inay rabsho horay u dhacday. Sidoo kale ma keeni karto caddey dhab ah oo sheegaysa inay xadgudubyo dhaceen.

Maxkamaddu kuma lifaaqi karto ballanqaad awoodda wax lagu xabiso (xiro), laakiin jebinta ballanqaad waxay caddeyneysaa tixgelin darro amarada maxkamaddda, waxaana loo dhaqan gelin karaa si la mid sida loo dhaqan gelinaayo amarada kale ee ay maxkamaddu soo saarto. Ballanqaadka (oo sida badan loo qoro erayo ahaan sida amarada faraxumeyn reebista) waxaa waajib ah inuu saxiixo qofka wax ballanqaadaaya. Maxkamaddu badanaa waxay siisaa labada qolo ee is haya arjiga N117/FL405 intaanay maxkamadda ka bixin.

Amar mala bedeli karaa?

Haddii dacwad lagu soo ooge, ama dawcad ooge uu damco inuu bedelo (badalo shuruudaha) ama uu ka tanaasulo (ka baxo) ama uu kordhiyo amar hanti la wareegis ah, faraxumeyn reebis ah, ama labadaba, waxaa waajib ah inay maxkamadda soo wargeliyaan. Maxkamadda ayaa diyaarin doonta dacwo qaadis kale.

Dalbashooyin ma laga heli karaa maxkamado kale?

Kuwa ku shaqada lihi waa inay ogaadaan, gaar ahaan kuwa ku shaqada leh kiis gaar ah oo ka dhacaaya maxkamad madani ama mid qoys, in aanay maxkamaddu ogaan karin falal kale oo ka oogan maxkamad danbiile - ilamaa ay warsadaan ma ahee. Tusaale ahaan, markay maxkamadi dhegaysanayso dacwad, si toos ah uma ogaan karto kiisas danbiilenimo oo horay loogu soo oogay danbiilaha, kuwaasoo wata shardi damiinasho, oo uu diidaaya dacwad lagu soo oogaha (dambiilaha eedaysan) in uu la xiriiro carruurta oo lagu soo oogay. Waxaa lagula talinaayaa cidda sharci ahaan wax matalysa inay marwalba weydiiyaan macaamishooda (dadka ay matalayaan) wixii falal kale ah oo jira. Waxaa laga yaabaa in ay maxkamaduhu dadka is haysta weydiiyaan in ay wax uga sheegaan dacwooyinka kale laakiinse waa in ay wakiillada sharcigu hubiyaan inay maxkamaddu og tahay dacwooyinkii horay u dhacay iyo kuwa iminka taaganba haddii la ogol yahay, in la sheego marka la eego sharciyadda caddeynta.

Qeybta 3 ee hagahan waxaanu kaga sii hadlaynaa arrinka xeerasha caddeynta, mawduuca wadaagista macluumaadka ee ka dhaxeysa maamulada caddaaladda. (fiiri qaybta ka hadleysa doorka ay leeyihiin adeegyada maxkamadaha denbi ku qaadista).

Racfaan (abiil) ma qaadan kartaa?

Racfaan amar Qaybta IV khuseeya waa la soo gudbin karaa, marka ay labada qof ee is haya ay yimaadeen maxkamadda, ka dibna uu midkood ku qanacsaneyn amarka la bixiyey. Racfaan waa in la soo gudbiyaa 14 cisho gudahooda marka kiiska la xukumay, laga soo bilaabo maalinta ay dacwaddu dhacday. Haddii qofka racfaanka qaadanaayaa aanu awoodin inuu soo gudbiyo racfaankiisa mudadaas, si loo ogolaado waqti dheeraad ah oo ay kusoo diyaarsadaan racfaankooda isaga ama iyadu waa inay ka dalbadaan isla

maxkamaddii go'aanka gaadhay.

Racfaanada waxaa lagu qabtaa maxkamado ka duwan tan kiiska xukuntay:

- Go'aano ay bixisay maxkamadda denbiyada yar yar (Magistrate) waxaa racfaan looga qaadan karaa maxkamadda sare (High Court)
- Go'aano uu bixiyey qaaddiga xaafadda ee fadhiya maxkamadda xaafadda, waxaa looga racfaan qaadanayaa qaaddiga sare ee maxkamadda xaafadda (Circuit Judge)
- Go'aano uu bixiyey qaaddiga maxkamada xaafaddu ee maxkamadda sare waxaa racfaan looga qaataa qaadiga maxkamadda sare ee isla xaafaddaas.
- Go'aano uu bixiyey qaadiga sare ee maxkamadda xaafaddu waxaa racfaan looga qaadan karaa maxkamadda racfaanka.

Maxaa laga filan karaa awoodda xabsi ku hayn?

Awoodda xabisidda waxaa lagu lifaaqi karaa qodob kastoo horjoogsanaya faraxumaynta (ilaa 1da July 2007da) ama amar degganaansho marka hanjabaad dagaal la arko. Awoodda xabisiddu waxay sarkaal booliis ah awood u siisaa inuu xiro dacwad lagu soo oogaha, iyadoon aanu haysan ogolaansho maxkamadeed (warrant), haddii iyada/isaga looga shakisan yahay inuu si muuqata inuu jebiyey amar maxkamadeed. Faa'iidada weyn ee ay u leedahay dacwad oogtada waa inaysan u baahneyn inay soo buuxiso arji kale si loo sameeyo ogolaansho maxkamadeed (warrant). Maxkamaduhu waxay ku lifaaqi karaan awooda xabisidda (xiridda) markay xukumid bixinayaan (ama qeyb amarka ka mid ah ay bixinayaan) ha ahaadeen xukumidaasu kuwa la wargeliyey ama kuwa aan la wargelin. Booliiska waxaa looga baahan yahay markii ay xiraan danbiilaha inay soo hor taagaan maxkamada (maxkamaddaas oo ah tii markii hore xukun riday) muddo 24 saacadood ah (oo ka bilaabanta waqtiga la xiray). Haddii aanay maxkamadu wax ka qaban karin arinta islamarka dacwaddaas, waxay leedahay awood ay kusii hayso danbiilaha xabsiga ama inay kusii dayso dammiin ahaan.

Hase yeeshee, qodobka 1 ee Sharciga dhibaataynta qoyska 2004 ayaa beddelaya sharciga xeerka qoyska si jebinta amarka horjoogsanaya faraxumaynta looga dhigo fal denbi ah marka la hirgaliyana 1da July 2007da, sharci ahaan uma suurtogali doonto maxakamaduhu in ay awood xabisid ku lifaaqaan amarrada horjoogsanaya faraxumaynta. Taas waxaa dheer, Sharciga Denbiga Habaysan ee Daran iyo Booliiska 2005 (SOCPA) ayaa beddelay liiska denbiyada xirista wata ee Qodobka 24 ee PACE wixii ka dambeeyey Jannaayo 2006dii si denbiyaasha dhammaantood looga dhigo kuwo xiris wata sidaasoo uu ku beddelay qodobka 10 ee Sharciga dhibaataynta qoyska 2004. Waxaa awood xabisid weli lagu lifaaqi karaa amarrada degganaanshaha, marka habboon.

Waa inay cadaan tahay awoodda xiristu xiliga ay dhacayso (expiry date). Mar marka qaarkood waxay dhici karaan ka hor inta amarada ay ku lifaaqan yihiin aanay dhicin. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaaa tani inay dhacdo, markii awoodda xabisiddu (xiriddu) ay ku saabsan tahay qayb ka mid ah amarka la bixiyey.

Arjiga awoodda xabisiddu (xiriddu) FL406, waxaa waajib ah inuu caddeeyo

dhammaan qaybaha amarka, amarkaasoo ay ku lifaaqan tahay awoodda xabisiddu (xiriddu). Arjigaa waa in loo dhiibaa taliyaha booliiska xaafadda uu ku yaal guriga dacwad oogaha. Tan waa inay la socotaa warqad ka timi dacwad oogaha (ama garyaqaankiisa) qoraalkaas oo caddeynaaya in dacwad lagu soo oogaha la ogeysiiyey waxyaabaha uu amarku ka hadlaayo.

Goormaa loo baahan yahay ogolaansho maxkamadeed (warrant) si wax loo xiro?

Haddii aan awoodda wax lagu xiro lagu soo lifaaqin amar ay maxkamadi bixisay, ama lagu soo lifaaqay laakiin ay khusayso qayb ka maid ah amarkaas, dacwad lagu soo ooguhuna uu jabiyey amar ahaa mid faraxumeyn ah ama hanti la wareegis ah, dalbaduhu waa inuu ka dalbadaa isla maxkamaddi madaniga aheyd inay soo saarto ogolaansho wax lagu xiri karo. Waxuu nidaamkaasi weliba hirgalaa haddii uu booliisku go'aansado in uu xiro ama denbi ku oogo danbiile eedaysan. Dalbashada waxaa la sameyn karaa ogeysiis la'aan (sida ku sharaxan kor) arjiga aad u baahan tahayna waa FL407 waa inay la socotaa qoraal caddeyn ah. Haddii ay maxkamaddu ku qanacdo inuu dacwad lagu soo ooguhu aanu u hogaansamin waxyaalaha uu amarku xanbaarsan yahay, ogolaansho maxkamadeed oo wax lagu xiri karo (warrant) ayaa la soo saarayaa. (arji FL408). Taas oo ay maxkamaddu u direyso taliyaha booliiska xaafadda dalbadaha.

Waa maxay ogeysiin ganaax?

Erayada soo socda ayaa la socda arjiyada ballanqaadista iyo foomka amarka degganaanshaha[10]: **" Waxaa waajib kugu ah inaad u hogaansantid digniinaha uu xanbaarsan yahay amarka xukunkan, haddii aad sidaa yeeli weydid, waxaad noqon danbiile sharaf riday maxkamadda, waana lagu xiri doonaa".**

Kan ayaa loo yaqaan ogeysiin ganaax, haddii dacwad lagu soo ooguhu uu u hogaansami waayo amarka ama ballanqaadka, dalbaduhu wuxuu isla maxkamaddii ka dalban karaa dacwad xabsi dhigis ah.

Inta ay socdaan dacwadahan dacwad lagu soo oogaha, haddii lagu helo jebinta amarka, waxaa waajib ku ah inuu muujiyo sababaha, taas oo laga wado inuu sharaxo sababta aan iyada/isaga loo xiri karin. Haddii uu ku guuldareysto inuu la yimaado sharaxaad buuxda oo ku saabsan falalkiisa, qaadiga ayaa ku xukumi kara waxa loo yaqaan maxkamad sharaf ridid. (Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida wax looga qaban doono jebinta amarrada horjoogsanaya faraxumaynta ka dib 1da July 2007da waxaa laga heli karaa bogga 20aad.)

Maxkamaddu maxay sameyneysaa markii la jebiyo amar?

Marka danbiilaha loo xiro jebinta amarka degganaanshaha ee wata awood xabisid waxaa la soo hortagayaa maxkamad. Maxkamaddu waxay awoodi kartaa:

[10] Laga bilaabo 1da July 2007da, foomam gooni ah ayaa u jiri doona amarrada horjoogsanaya faraxumaynta iyo kuwa degganaanshaha.

- Inay arinta u guda gasho si deg deg ah, ayna u sameyso amarada loo baahan yahay ama
- Inay dib u dhigato kiiska (kiiska waxaa mar kale maxkamadda loo soo hordhigayaa 14 cisho gudahood (haddii aanan waqtiga oggolaansho lagu kordhin) wayna siideynaysaa danbiilaha iyo
- Inay siiso qaybaha is haya ogeysiis aan ka yareyn laba maalmood oo ku saabsan kiiska dib loo dhigay.

Markii la isugu yimaado dacwadda wax lagu xibisaayo (xiraayo) maxkamaddu waxay go'aaminaysaa in amar la jabiyey iyo in kaleba, haddii la ogaado in amar la jabiyey, waxay maxkamaddu go'aamisaa ganaaxa ay bixinayso. Maxkamadaha arrimaha qoyska waxay iminka ku xukumaan ilaa laba bilood oo xarig ah, maxkamadaha xaafadduna ilaa labo sano. Badi xarigu waa asbuucyo ama bilo meeshii uu ka ahaan lahaa sanado. Kiisaska intooda badan maxkamaduhu waxay joojiyaan amarka wax xirista, taasoo macnaheedu yahay danbiilaha looma diro xabsi, haddii uu u hogaansamaayo waxyaalaha uu amarkaasi xanbaarsan yahay.

Waa maxay noocyada xabsi ku hayn ama dammiin ku siideyneed?

- **Xabsi ku celin:** Danbiilaha xabsiga ayaa lagu sii haynaayaa, waxaana la soo hor joojinayaa maxkamadaa markii la gaaro dhammaadka xarigiisa (caadi ahaan muddo aan ka dheerayn 8 cisho marka go'aankan la qaadanaayo). Haddii xabsi ku hayntu ay ka yar tahay 3 maalmood danbiillaha waxaa lagu hayn karaa saldhiga booliiska.

- **Xabsi ku celin** – sida kore laakiinse waa in danbiilaha loogu yeero tuhunsane

- **Dammiin ku siideyn:** Danbiilaha waa la dammiinan karaa taasoo macnaheedu yahay xabsiga laguma haynaayo, laakiin waa inuu raacaa shuruudaha ay maxkamaddu dejisay. Kuwan waxaa ku jiri kara lacag bixin, lacagtaas oo ah heshiis ku waajib yeelaaya inuu bixiyo lacag, si loo hubiyo inuu danbiiluhu ku soo laabto maxkamadda, ama qof lacag ku damiinanaya danbiilaha. Waqtigan damiinashadu waa inaanay ka badnaan 8 cisho ilamaa ay labada qayboodba ku heshiiyaan inay mudada dheeraystaan. Si kastaba ha ahaatee dacwadda dib loo dhigay kama badnaan karto 14 cisho, ka dib marka danbiilaha la soo xiro.

- **Damiin ku siideyn:** Tuhunsanaha waxaa lagu damiinan karaa shuruud la'aan ama shuruudo. Haddii uu tuhunsanuhu iman waayo taariikhda iyo saacadda iyo goobta lagu damiintay, ama uu jebiyo shuruudaha damiinshadiisa, waa la xiri karaa waxaana la hor keeni karaa maxkamadda. Xaaladdii haynta dib ayaa markaa il cusub loogu eegi doonaa duruufaha jebinta awgood.

- **Dammaanad dheeri ah:** Haddii danbiiluhu aanu awoodi karin inuu hor yimaado maxkamadda sababo ay keenayaan xanuun ama dhibaato kale, waqtiga damaanadda waa la dheerayn karaa si arimahaas muddo loo siiyo.

- Sida kore, laakiinse iyadoo la adeegsanayo ereyga tuhunsane oo aanan la adeegsan danbiile.

Qodobka 1 ee Sharciga dhibaataynta qoyska 2004 ayaa jebinta amarka horjoogsanaya faraxumaynta ka dhigaya fal denbi ah. Qofka waa loo xiri karaa jebinta amarka horjoogsanaya faraxumaynta haddii ay sidaas sameeyaan iyagoon sabab macquul ah haysan welibana goorta ay ka warhayaan jiritaanka amarka.

Qofka laguma heli karo denbi marka la raaco qodobka 1 kaasoo la xiriira habdhaqan hore looga ciqaab mariyey in uu yahay sharaf ridid maxkamadeed. Welibana qof lagama ciqaab marin karo sharaf ridid haddii habdhaqanku uu keeno dembi helid sida raacsan qodobka 1.

Haddii booliiska loogu yeero jebinta amar horjoogsanaya faraxumaynta oo ay xiraan danbiilaha/eedaysanaha, iyo haddii (marka lagala kaashado dhibbanaha codsadaha ah iyo adeegga dacwad oogidda ee CPS) go'aanka la gaaraa uu yahay in aanan dacwad la oogin, dhibbanaha codsadaha ah waxuu weli maxkamadda madaniga ah codsi uga diran karaa si jebinta loo tixgeliyo in ay tahay sharaf ridid maxkamadeed.

Dhibbanaha codsadaha ah waxaa kaloo uu go'aansan karaa in uusan booliiskaba arrinka soo dhexgalin oo uu si gooni ah ugu codsado oggolaansho xiris ama uu sameeyo qabanqaabiyana geynta ogeysiis muujinaya sababta aysan u habboonayn in danbiilaha xabsiga la dhigo sidaasna markaas arrinka wax looga qabto maxkamadda madaniga ah dhexdeeda iyadoo loo tixgelinayo sharaf ridid, sida kor ku qeexan.

Haddii eedaysanaha la xiro denbina lagu oogo nidaamka la raacayaa waxuu la mid yahay ka u yaalla amarrada degganaanshaha ee korreeya marka laga reebo xaqiiqada ah in eedaysanaha la hor geyn doono maxkamadda denbiyada yar yar marka ugu horraysaba. Dhibbanaha codsadaha ah ee hawshii madani ee ugu horraysay, ayaa markaa dacwad denbi oogid u noqonaya dhibbanaha markhaatiga muhiimka ah Adeegga Dacwad oogidduna dacwad ayuu markaas oogi doonaa haddii caddayn ku filani ay jirto oo ay danta shacabka tahay in sidaas la sameeyo.

SHARCIGA KA ILAALINTA DHIBAATADA 1997 (MADANI)

Sharciga ka ilaalinta dhibaatada ee 1997 (PHA 1997) wuxuu xanbaarsan yahay daaweyn madani ah iyo ganaax danbiile labadaba markii laga hadlaayo dhibaateyn qoys. Waxaanu ku sharaxeynaa ganaaxidda danbiile Qaybta 3 ee Hagahan.

Daaweynta ku xusan sharcigan waxay la siman yihiin kuwa Sharciga xeerka qoyska ee 1996. Sharciga ka ilaalinta dhibaatada ee 1997 waxaa markiisi hore loogu talogalay in lagu xaliyo dhibaatada daba socodka ama jid-u-fadhiisiga laakiin waxaa kaloo isticmaali jirey dadka aan dalban karin amar marka la eego sharciga xeerka qoyska 1996 maadaama aanay soo buuxin karin shuruudaha loogu tala galay 'la xiriiris' loo soo maraayo xiriir qoys ama/iyo mid wada noolansho. Ilaa xad waxaa xaaladdaas lagu wanaajin doonaa Sharciga dhibaataynta qoyska 2004: qodobka 3 – kaasoo lammaaneyaasha isku jinsiga ah ee wada nool u oggolaan doona helitaanka amarrada Qaybta IV sida lammaaneyaasha kala jinsiga ah (kaasoo hirgalay Diisembar 2005tii), iyo qodobka 4 - kaasoo lammaaneyaasha aan weligood wada noolaan ama is guursan u qalmin doona amarrada Qaybta IV (kaasoo hirgalaya 1da July 2007da).

Sharciga ka ilaalinta dhibaatada ee 1997 wuxuu bixiyaa daaweyn madani ah si loo xanibo danbiilaha - oo la xukumo habdhaqankiisa iyo/ama laga saaro meelaha u dhow guriga codsadaha ama meeshiisa shaqada - iyo in la raadiyo dhaawacyo ay keeneen dhibatooyinkaasi. Kuwan waxaa ka mid ah amaro ay maxkamaddu bixisay oo reebaaya sameynta ficilada qaar (injunction) iyo dalbashada dhaawacyo. Tusaale ilaa xad dhow ayaa muujinaya baaxadda suurogalka ah ee Sharcigan. Waxaa codsi lagu guulaystay laga dirsaday hooyada ninka goortaas oo codsadaha la siiyey £35,000 oo magdhow ah markaasoo ay dhibaatadu ahayd xadgudubka ulakac iyo taxaddar la'aanta ku yimid ee loo geystey haweeney da' yar ayna u geysatay hooyada ninkeedu[11].

Yaa dalban kara?

Markii sharcigan la eegaayo qof walba ayaa dalban kara amarada ay maxkamadi bixiso ee reebaya ficilada qaar (injunction) ama dhaawacyo ay cid kale geystay.

Marka la eegaayo qaybta 3aad ee sharcigan waxaa lagu saleyn karaa, "sharci jabin dhab ah ama mid laga cabsi qabo ee qaybta 1aad". Tani waxay kasoo horjeedaa dacwadaha danbiile ee sharcigan, kuwaasoo u baahan cadeyn ah "habkey wax u dhaceen" oo macnaheedu yahay danbiile inuu dhibay dalbadaha ugu yaraan laba mar oo hore.

Maxkamadahee ku shaqo leh?

Dalbashooyinka hoos imanaaya qaybta 3aad ee sharcigan waxaa laga dalban karaa maxkamadda sare, ama maxkamadda xaafadda, maxkamadda arrimaha qoyska wax kama qaban karto kiisaskan.

[11]Singh –v- Bhakar (4NG17900) Nottingham County Court 24 July 2006

Sidee bay dalbadayaashu u dalbanayaan?

Haddii booliisku ay go'aansadaan inay soo oogaan dacwado danbiile oo hoos imanaaya qaybaha 2 ama 4 ee sharcigan, gebi ahaanba muhiim ma ahan in la soo oogo dacwado madani ah. Haddii uu dalbade go'aansado inuu sameeyo dacwad madani ah taasoo ah sida ku cad qaybta 3aad , kaligiis ayaa soo oogi kara dacwadda ama waxuu qabsan karaa garyaqaan. Qabsashada garyaqaan taas way ka lacag badan tahay, ilamaa ay dalbadayaashu helayaan qarash kiis ka bixin (eeg bogga 11). Dalbadaha raba inuu kiiska soo oogado keligiis waxaa waajib ku ah inuu diyaar u yahay inuu buuxiyo dhammaan arjiyada loo baahan yahay waana inuu soo hor istaagaa maxkamadda haddii ay noqoto maxkamad qaadis, iyo xataa suurogalka su'aalo uu u jeediyo ama isaga uu weydiiyo eedaysanuhu.

Natiijo ka gaarista dalab magdhow ama amar ay maxkamadi bixiso oo lagu reebaayo ficilada qaar, dalbadayaashu waxay heli karaan fursado kala duwan. Waxaa suurtogal u ah:

1. Inay dalab u sameysato caddad la yaqaan (dhaawacyo lacag qariran 'go'an' ah), ama
2. In dalab u sameysto cadad aan la aqoon (dhaawacyo lacag aan qarirneyn (aan la garaneyn); iyo/ama
3. In la dalbado amaro ay maxkamadi ku reebto sameynta ficilada qaar oo ay lacagi la socoto ama aanay la soconin.

Xulashadoodu siday rabto ha ahaatee, dalbadayaashu waxay u baahan yihiin arjiga N1 (kaasoo maxkamadda laga heli karo). Lacagta la bixinaayaa waxay ku xiran tahay xalanka la raadinaayo, sidoo kale waxaa taasi ku xiran habka maxkamadda loo maraayo. Si kastaba ha ahaatee haddii uu dalbaduhu rabo inuu sameeyo fursadda 3aad, dacwad dhegeysi ayaa lagu hor qaban doonaa qaadiga maxkamadda ama qaadiga ugu sareeya maxkamadda xaafadda.

Dalbadayaasha xulanaya fursadda 1aad ee kor ku qoran, loogama baahna inay soo hor yimaadaan qaaliga. (judge) haddii danbiiluhu kasoo jawaabi waayo dalbashada uuna ka baaqsado inuu soo gudbiyo is difaac, dacwad soo oogistaadu waxay weydiisay kartaa inay maxkamaddu gaarto go'aan iyada u daneynaaya. Xaaladahan oo kale imaatinka maxkamaddu muhiim maaha. Markay jirto xaalad deg deg ah dalbaduhu wuxuu maxkamadda ka dalban karaa amarka ay maxkamadi soo saarto oo reebaaya ficilada qaar, oo ku meel gaar ah ama muddo gaaban ah, ka hor intaan la qaban dacwad buuxda, waxaana la isticmaalayaa arjiga (form) N244.

Ma jiraan wax dhaqangelin ah oo uu leeyahay Sharciga ka Ilaalinta Dhibaato ee 1997?

Marka laga hadlaayo sharcigan jabinta amar waxay noqonaysaa fal danbiilenimo. Ma jiraan wax sii diyaarin ah marka laga hadlaayo sharcigan oo loogu talogalay awoodda wax lagu xiro sidii ku cadeyd markii laga hadlaayey Sharciga xeerka qoyska ee 1996, laakiin markii ay maxkamaddu bixiso amar reebaaya ficilada qaar si ay u hor istaagto danbi lagu soo eedeeyaha, dacwad soo oogtaduna ay cadeyso in dacwad lagu soo ooguhu uu jabiyey amarkaan, waxay dalban kartaa ogolaanshaha maxkamadeed ee

wax lagu xiro (warrant) (iyadoo ka dalbanaysa maxkamadi markii hore amarka bixisay). Ogolaansho maxkamadeed oo wax lagu xiri karo, waxaa la bixiyaa oo keliya marka dalabka ay la socoto dhaar, uuna qaaligu u arko inay jiraan sababo macquul ah oo lagu rumaysan karo inaanu dacwad lagu so ooguhu u hogaansamin amarka, ama qayb ka mid ah amarka. Markaa ayaa ogolaansho maxkamadeed oo wax lagu xiro loo dirayaa taliyaha saldhiga booliiska ee xaafadda uu deggan yahay dalbaduhu. Hase yeeshee, haddii falka lagu geystey jebinta uu yahay fal denbi, booliiska ayaa markaas qofka u xiri kara gafkaas denbiga ah.

Sidoo kale, waxay dalbatadu sameyn kartaa "dalbasho xirid" - dalbasho lagu dhigaayo xabsiga danbiilaha. Markay dalabkan ay soo saaraan shaqaalaha maxkamaddu waxaa loo liisgelinaayaa dhegaysi dacwadeed. Ka dib, haddii jebinta la caddeeyo, danbiiluhu waa inuu muujiyaa sababta aan iyada/isaga loo xireyn, ka dib markuu amar u hogaansami waayey.

SHARCIGA LAMMAANTA MADANI 2004

Kaasoo hirgalay 5tii Diisembar 2005tii, waxuu sharcigani soo saaray nooc cusub oo xiriir sharci ah, kaasoo ay wada geli karaan laba qof oo:

- isku jinsi ah;
- aan hore ugu jirin lammaan madani ama aan sharci ahaan is qabin;
- aan ku jirin hababka xiriirka ee mamnuuca ah;
- labadooduba yihiin lix iyo toban jir ama ka weyn yihiin.

Lammaanta madani ma aha guur laakiinse waa xiriir u dhigma oo sidaasoo kale dhab u ah looguna huran yahay kaasoo loo soo saaray si lammaaneyaasha isku jinsiga ah loo siiyo hab sharci ahaan loogu aqoonsado xiriirkooda haddii ay rabaan. Waxay taasi u keeni doontaa lammaanaha xaaladda ahaanshaha lammaanaha madani ee qofka kale. Gelitaanka hawsha is diiwaangelinta ayaa lagu geli doonaa lammaan madani oo u dhiganta guurka. Sharciga waxaa weliba loogu talagalay qaar ka mid ah xiriirrada sharciga ah ee ku diiwaansan sharci qalaad (xataa guurka dadka isku jinsiga ah ee dalalka oggol lammaanta madaniga ah) in uu u fududeeyo in Ingiriiska looga aqoonsado sida lammaan madani ah.

Waxuu Sharciga lammaanta madani 2004 (qodobka 82, Taxanaha 9) wax ka beddelayaa Qaybta IV ee Sharciga xeerka qoyska 1996 si markaas isla qodobbo keliya ay wada khuseeyaan lammaaneyaasha madaniga ah iyo lammaaneyaasha is qaba. Waxay taasi ka dhigan tahay marka ay jiraan qodobbo khuseeya 'xaas' oo ku dabbakhma amar degganaansho, ay lammaaneyaasha madanigu leeyihiin isla xuquuqdaas. Qodobka 3 ee Sharciga dhibaataynta qoyska 2004 ayaa wax ka beddelay liiska 'dadka isku xiran' ee Sharciga xeerka qoyska ee 1996 islamarkaa si loo caddeeyo in 'wada nooleyaasha' ay ku jiraan wada nooleyaasha isku jinsiga ah.

SHARCIGA GURI KU DHIBAATAYNTA, DENBIGA IYO DHIBBANEYAASHA 2004[12]

Qodobbada Sharciga saamaynaya Sharciga xeerka qoyska 2006 ee la hirgelinayo 1da July 2007da waa qodobbada 1 iyo 4. Qodobbada 2 iyo 3 waxaa la hirgeliyey Diisembar 2005tii: qodobka 2 waxuu qeexayaa shuruudo dheeraad ah oo loogu talagalay haddii ay qolooyinku wada nool yihiin ama hore u wada noolaan jireen iyo nooca xiriirkooda; qodobka 3 waxuu lammaaneyaasha isku jinsiga ah ee wada nool u fasaxayaa in ay helaan isla amarrada horjoogsanaya faraxumaynta iyo degganaanshaha.

Qodobka 1 waxuu jebinta amarka horjoogsanaya faraxumaynta ka dhigayaa fal denbi. Waxaa jebinta lagu ciqaab marin doonaa ilaa shan sano oo xarig ah marka denbiga lagu helo. Faahfaahinta waxaa looga hadlayaa kor qaybta "Maxkamaddu maxay sameyneysaa markii la jebiyo amar?" hoosteeda.

Qodobka 4 waxaa loogu talagalay qaar ka mid ah lammaaneyaasha aanan weligood wada noolaan ama is guursan, in uu u qalmiyo amarrada horjoogsanaya faraxumaynta iyo degganaanshaha.

Qodobka 12: kaasoo maxkamadaha u fasaxaya in ay amarro xakamayn dejiyaan marka ay xukun ka sheegayaan denbi (iyo marka ay denbi dhaafayaan) waxuuna qof kastoo ku magacaaban amarka xakamaynta xaq u siinayaa in laga matalo maxkamadda haddii la soo gudbiyo codsi lagu beddelayo ama lagu tirtirayo amarka. Qodobkani waxuu sidoo u hirgelayaa 1da July 2007da faahfaahintuna waxay ku qeexan tahay Qaybta 3 hoosta qaybta ka hadlaysa dhinacyada denbiga la xiriira ee Sharciga ka ilaalinta dhibaatada 1997.

[12] http://www.legislation.hmso.gov.uk/acts/acts2004/20040028.htm

QAYBTA 2: CARRUURTA

SHARCIGA CARRUURTA 1989

Taxanaha 6 ee Sharciga xeerka qoyska 1996 ayaa wax ka beddelay Sharciga Caruurta 1989 si maxkamadda loogu oggolaado inay ku lifaaqdo shardi, wata awoodda wax lagu xiro haddii muhiim loo arko, si qof loogu saaro ama loogu diido guriga ilmaha, ama qofkaas loogu diido gelitaanka meelo go'an oo u dhow guriga ilmaha. Marka ay maxkamaddu awood u leedahay amarka shardiga u diidista waxay halkaa ka aqbali kartaa ballanqaadka qofka habboon.

Maxkamaddu waxay keliya oo ay amaradan ku bixin doontaa (iyadoo eegaysa qodobbada 44A, 44B, 38A iyo 38B ee Sharciga Carruurta 1989) (sida ku qoran Taxanaha 6 ee Sharciga xeerka qoyska 1996) haddii amar ilaalin deg deg ah, ama amar daryeelis ku meel gaar ah la gudbiyey.

SHARCIGA ILMO KORINTA AADAN DHALIN (ADOPTION) IYO CARUURTA 2002

Sharciga ilmo korinta aadan dhalin iyo caruurta waxaa la soo rogay Nofeembar 2002. Sharcigani wuxuu hadda caddeeya markii ay maxkamadi ay go'aan ka gaareyso dalabyo iyadoo eegaysa qaybta 8aad Sharciga Badbaadada Ilmaha ee 1989, waxay kaloo go'aan ka gaareysaa haddii uu ilmuha dhib ka soo gaaray, ama laga yaabo inuu dhib kasoo gaaro, waxaa waajib ah inay u aragto dhib inay ilmaha ku dhacdo rabshado qoys balse ay dhibaato ugu filan tahay inuu markhaati joogo goob ay ka dhacayso rabshado qoys (witness).

Qeexitaanka la cusboonaysiiyey ee waxyeellada waxuu si rasmi ah u hirgelay Jannaayo 2005tii. Dib-u-habeyntan ayaa ah hage loogu talogalay maxkamadda si loogu daro kuwa hadda jira- kuwaasoo loogu talogalay maxkamadda iyo xirfadleyaasha ku shaqada leh – wax ka qabasho dhibaateyn qoys.

Foomamka C1 iyo C1A (ee loo yaqaanno foomamka 'Gateway' (Iridda)) oo dib loo cusboonaysiiyey, kuwaasoo loogu talagalay codsiyada xiriirka iyo deggannaanshaha ilmaha waxaa iyagana sidoo kale la soo saaray 31kii Jannaayo 2005tii . Codsadeyaasha iyo danbiileyaasha waxaa la siiyey fursad ay marxalad hore kaga walaac sheegtaan wixii waxyeello ah, iyagoo Maxkamadaha ku siinaya warbixin si ay uga fiirsadaan in dhacdooyinka dhibaataynta qoysku ay saamayn daran ku yeesheen ilmaha, ama ay saamayn karaan ilmaha mustaqbalka.

SHARCIGA CARUURTA 2004

Sharciga Carruurta 2004 ayaa beddelay xeerasha u yaalla sheegidda warbixinta marka laga hadlayo kiisaska carruurta khuseeya. Xeerar cusub ayaa soo hirgalay 31kii Oktoobar 2005tii. Si aad faahfaahin buuxda u hesho fiiri hagista ku taalla bogga internetka ee Adeegga Maxkamadaha: http://www.hmcourts-service.gov.uk/docs/ex710_1105.pdf

Xeerasha cusub kuma jiro wax yaraynaya mabda'a ah in wanaagga carruurtu uu yahay waxa ay maxkamaduhu sida ugu weyn uga walaac qabaan amaba wax horjoogsanaya awoodda caadiga ah ee maxkamaduhu in ay fasaxdo ama xadayso sheegidda guud marka laga hadlayo kiisas gaar ah. Waxay xeerashaasi isku dheellitirayaan baahida carruurta iyo dadka waaweyni ay u qabaan sirta iyo baahida ay u qabaan in ay raadsadaan talobixin iyo taageero habboon. Waxay xeerashu soo raacaan isbeddello kale oo lagu sameeyey sharciga horraantii sanadka.

Qodobka 62 ee Sharciga Carruurta 2004 waxuu hirgalay 12kii Abriil 2005tii. Waxay taasi ka dhigan in:

- Aysan iminka ahayn fal denbi in qolo ka tirsan kiisaska qoyska ee carruurtu ku jirto ay amarrada u sheegaan shakhsiyaad ama ururro kale, haddii aanan wax looga sheegin dadweynaha, ama qayb ka tirsan dadweynaha, ama warbaahinta; iyo

- Aysan iminka ahayn sharaf ridid maxkamadeed in war la sheego marka ay xeerashu oggol yihiin duruufo lagu sheegi karo war gaar ah oo ku saabsan kiisaska qoyska ee khaas ahaan loo qabto kuwaasoo ay carruurtu ku jirto.

SHARCIGA CARRUURTA IYO KORINTA ILMO AADAN DHALIN 2006

Sharciga Carruurta iyo Korinta ilmo aadan dhalin 2006[13] waxaa u dhammaatay in uu soo maro baarlamaanka waxuuna Oggolaansho Boqortooyo helay 21kii June 2006dii. Markuu hirgalo waxuu Sharcigu maxkamadaha siin doonaa awood sii dabacsan si loo fududeeyo xiriirka ilmaha loona dhaqan geliyo amarrada xiriirka ee lagu sameeyo Sharciga Carruurta 1989. Waxuu Sharcigu fursado dheeraad ah siin doonaa maxkamadaha marka ay wax ka qabanayaan kiisaska xiriirka markaasoo uu khilaaf ka dhexeeyo waalidka. Tallaabooyinka fududaynta ee cusub ee Sharciga ku jira waxaa ka mid ah maxkamadaha oo la siiyo awood ay waalidiinta ugu amri karaan in ay galaan "waxqabad xiriir" sida ka qayb qaadashada barnaamijyada ama casharrada waalidnimada, ama kulannada warbixineed, ka hor inta aanan amar xiriir la samayn. Waxuu Sharcigu weliba maxkamadaha u awood siin doonaa in ay shuruudo ku xiraan amarrada xiriirka, kuwaasoo waalidka uga baahan kara in uu galo "waxqabad xiriir" iyagoo weliba dhigi doona baahida sarkaal ka socda adeegyada taageerada iyo talosiinta maxkamadeed ee carruurta iyo qoyska si uu kaasi u maareeyo xiriirka.

Marka la jebiyo amar xiriir, waxaa jira qodobbo Sharciga ku jira oo lagu dhaqan gelinayo amarrada xiriirka, kuwaasoo maxkamadaha u fasaxaya in qofka amarka xiriirka jebiyey ay ku khasbaan shaqo aan mushaar lahayn. Waxay taasi xaaladda u dabcin doontaa maxkamadaha marka ay wax ka qabanayaan jebinta amarrada xiriirka, waxayna soo raaci doontaa awoodaha jira ee jebinta amarka loogu tixgelinayo sharaf ridid maxkamadeed.

[13] Qoraalka Sharciga waxaa laga heli karaa: http://www.opsi.gov.uk/acts/acts2006/20060020.htm
Isku xirahani waa Dukumeentiga Talooyinka Dawladda ee ku saabsan Kala tegidda Waalidka: Baahiyaha Carruurta iyo Masuuliyadaha Waalidka: http://www.dfes.gov.uk/childrensneeds/

Qodobka 7 ee Sharcigu waxuu ka rabaa saraakiisha adeegyada taageerada iyo talosiinta maxkamadeed ee carruurta iyo qoyska (CAFCASS), ama saraakiisha kiisaska qoyska ee Wales, in ay qabtaan baaritaanno halis oo ay ku qabtaan kiisaska sharci oo khaas ah sida uu dhigayo Sharciga Carruurta 1989 [amarrada degganaanshaha/xiriirka/tallaabooyinka mamnuuca ah iyo arrimaha gaarka ah] marka ay u arkaan in ay jirto sabab looga shiki qabo in uu ilme waxyeello halis ugu jiro. Waxaa markaas laga rabaa in ay maxkamadda ka wargeliyaan natiijooyinka baaritaankooda la xiriira halista waxyeello ilmaha gaarta.

[Waxaa la filanayaa qodobbada qaybta 1aad ee Sharciga carruurta iyo korinta ilmo aadan dhalin 2006 ee la xiriira Amarrada Kaalmada Qoyska iyo baaritaannada halistu in ay hirgeli doonaan laga bilaabo Oktoobar 2007da.]

QAYBTA III - GANAAXYADA DENBIILE

Sharci dejin

Ma jirto xadgudub gooni ah oo ay leedahay qoys dhibaateyn ee sharciga danbiile. Sidaas daraadeed go'aan ka gaaristu waxay ku salaysnaan doontaa xaaladaha gaarka ah ee xadgudubka ama rabshad. Tan macnaheedu waxaa weeye inay jiraan denbiyo badan oo rabsho oo soo hoos gelaaya marka laga hadlaayo qoyska iyo weliba kuwa ka dhasha mawduuca guurka khasabka ah. Qodobbada Sharciyada soo socda ayaa ku dabbakhma kiisaska dhibaataynta qoyska – liiskani ma dhammaystirna:

Dilka ulakaca ah	Sharciga guud
Dilka aan ulakaca ahayn	Sharciga guud
Jebinta Damiinashada	Sharciga damiinashada 1976 qod6(1) (2) iyo (7)
Khasaaraha denbi	Sharciga khasaaraha denbi 1971 qod1 (1)
Weerarka caadiga ah	Sharciga caddaaladda denbiga 1988 qod39
Ku hanjabaadda dilka	Sharciga denbiyada dadka loo geysto 1861 qod16
Waxyeellada daran ee jirka ee ulakaca ah	Sharciga denbiyada dadka loo geysto 1861 qod18
Waxyeellada daran ee jirka/dhaawaca	Sharciga denbiyada dadka loo geysto 1861 qod20
Waxyeellada jirka ee dhabta ah	Sharciga denbiyada dadka loo geysto 1861 qod47
Wax kale	Sharciga denbiyada dadka loo geysto 1861
Dhibaatada	Sharciga ka ilaalinta dhibaatada qod2(1) iyo (2), 4(1)
Dagaalka	Sharciga degganaanta shacabka 1986 qod3
Akhlaaqda hanjabaadda leh	Sharciga degganaanta shacabka 1986 qod4
Akhlaaqda hanjabaadda leh ee ulakaca ah	Sharciga degganaanta shacabka 1986 qod4(A)
Kufsiga	Sharciga denbiyada galmada 1956 qod1
Ku weerarka galmada	Sharciga denbiyada galmada 2003 qod2
Weerarka galmada la xiriira	Sharciga denbiyada galmada 2003 qod3
Wax kale	Sharciga denbiyada galmada 2003
Tuuganimada	Sharciga tuuganimada 1968 qod1
Musuqmaasuqa	Sharciga tuuganimada 1968 qod21
Cabsigelinta markhaatiga	Sharciga caddaaladda denbiga iyo degganaanshaha shacabka 1994 qod51
Gelitaanka sharci darrada ah ee denbiga	Sharciga xeerka denbiga 1977 qod6(1)
Naxariis darrada loo geysto carruurta	Sharciga carruurta iyo dhallinyarada 1933 qod1

Afduubka ilmaha	Sharciga afduubka ilmaha 1984 qodobbada1 iyo 2
Soo gelinta sharcidarrada ah ee dhiig miirasho lagu rabo	Sharciga magangalyada iyo haajiraadda (habdhaqanka loo muujiyo dalbadeyaasha, iwm) 2004 qod4
Soo gelinta sharcidarrada ah ee dhiig miirasho galmada la xiriiirta lagu rabo	Sharciga denbiyada galmada 2003 qodobbada57-60

Maxkamadaha xaliya denbiyada yar yar ayaa ku shaqo leh dhammaan dhibaateyn qoys marka ugu horraysay marka ay jirto oogid laga samaynayo fal denbi, maadaama ay kiisaska denbigu dhammaantood ka bilaabmaan maxkamadda denbiyada yar yar. Iyadoo la eegaayo heerka waxyeelo ee danbiga, kiisaska waxaa laga yaabaa in loo gudbiyo maxkamadda sare. Tusaale ahaan, danbiyada qaar ay ka mid yihiin kufsiga waxaa laga gudbiyaa maxkamadda denbiyada yar yar iyadoo loo gudbinaayo maxkamadda sare, oo kuwaas loo yaqaanno denbiyada ‘la oogi karo uun’. Kiisaska noocaas ah maxkamadda denbiyada yar yar ee habboon ayaa ka go’aan gaari doonta in uu kiisku yahay mid aad u weyn oo iyada ka weyn si ay wax uga qabato. Haddii ay sidaas tahay, waxay u diri doonaan kiiska maxkamadda sare. Haddii ay go’aansato in ay dhegeysan karto kiiska tuhunsanaha ayaa weli dooran kara in kiiska lagu dhegeysto maxkamadda sare. Kiisaska ‘yar yar uun’ ayaa keligood lagu dhegeysan karaa maxkamadda denbiyada yar yar.

Ka badbaadayaasha dhibaateyn qoys kuma adkeysan karaan in maxkamadda sare inay bilowdo denbi ku qaadis denbiile. Haddii maxkamadda sare ay go’aansato inaysan sii wadeyn kiis, sababo hoos ku xusan awgood, markaa ka dib ka badbaaduhu wuxuu bilaabi karaa inuu dacwaddiisa horgeeyo maxkamad madani ah meeshuu ka hor geyn laha mid danbiile. Si kastaba ha ahaatee maxkamada sare waxaa siyaasad u ah inay ka garnaqdo kiisaska oo dhan markay suurtogal tahay.

Waa maxay jawaabta booliiska ka bixiyo dhibaateyn qoys?

Inta badan booliisku waxay leeyihiin kooxo qaabilsan dhibaatooyin qoys loo gaysto. Kooxahaas dhexdooda saraakiil gaar ah, oo tababbar takhasus ah u leh dhibaataynta qoyska (iyo meelaha qaarkood takhasusyo kale sida guurka khasabka ah), ayaa kaalmeeya ka badbaadayaasha rabshado qoys. Dhammaan xoogagga booliisku waxay leeyhiin kooxo qaabilsan nabadgelyada beesha oo la shaqeeya saldhigyada booliiska ee degaamadaas halkaas ayaana badi saldhig u ah kooxaha dhibaataynta qoyska. Kooxahaasi waxay weliba siin karaan talooyin ka badbaaadayaasha rabshado qoys waxayna xaliyaan dhibaatooyin kala duwan oo ay ka mid yihiin xadgudubka jinsiyadda, buuq xaafad ku samayn iyo arimo kale sida denbiyada necaybka iyo xataa rabshadda khaniisiinta ku jeedda. .

Markii booliis loogu yeero goob ay ka dhacday dhibaateyn qoys waxay sida badan sameeyaan:

- Inay qaadaan baaritaan bilow ah ayna isku dayaan in ay qabtaan dhammaan caddaynta jirta, helaan caddaynta kale ee laga yaabo in ay jirto, ay helaan

markhaatiyaasha suurogalka ah ee jooga goobta ayna helaan macluumaadka markhaatiyaasha kale marka habboon.

- Inay xiran xadgudbaha haddii ay haystaan sabab taas u fasaxaysa oo uu weli ku sugan yahay goobta, ama la soo heli karo (uma baahna amar maxkamadeed oo wax lagu xiro si ay u xiraan qof ay uga shakisan yihiin inuu geystay ama uu rabo inuu geysto dhibaato ama jebinaaya xasilooni; umana baahna inay iyagu ka markhaati ahayeen dhibka dhacay).

- Inay isku dayaan inay isla markaas ka qoraan dhibanaha qoraal caddeyn ah, iyagoo ka fogeynaaya dhibgeystaha, xitaa haddii ay cadeyntu tahay mid kooban oo sahlan. Hase yeeshee, marka ay caddayn jirto taasoo uu booliisku soo qabtay, waxaa kiisaska la sii wadi karaa iyadoon wax taageero ah looga baahnayn dhibbanaha. Ujeeddooyinka helitaanka bayaanka dhibbanaha waxaa ka mid ah in uu kaasi ka caawiyo iyaga inay wareysi kaga qaadaan tuhunsanaha saldhigga booliiska. Waa in tuhunsanaha denbi lagu oogo muddo 24 saacadood ah gudaheed ka dib xirista, haddii aanan waqti dheeraad ah la helin. Mararka qaar damiinasho ayaa tuhunsanaha lagu sii dayn karaa, si uu saldhigga booliiska ugu soo laabto, si caddayn dheeraad ah loo helo.

- Mararka qaarkood inay weydiistaan badbaadada inay aragto baaraha caafimaad ee denbiyada (forensic medical examiner). Haddii ay ogolaato booliisku waxay u kaxeyn karaan saldhiga booliiska si loo sameeyo baarista. Mararka qaarkood baaraha caafimaad ee denbiyada waxay boolisku igu yeeraan inuu yimaado goobta denbigu ka dhacay. Haddii ay nacayso inay aragto baaraha caafimaad ee danbiyada waxaa lagula taliyaa inay aragto dhaqtarkeeda ama tagto cisbitaalka xaafadda sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka u ah. Tani ma hubinayso qiimeyn caafimaad oo rasmi ah, laakiin waxay kaloo keenaysaa cadeyn dhaqtareed (medical evidence) oo cadeyn ahaan loo isticmaali karo markii kiiska maxkamad la horgeeyo.

- Inay la taliyaan badbaadada sida ay qabto istiraatiijiyadda dhibaateyn qoyska ee u taal booliiskaas, iyadoo lagala talinaayo fursadaha u furan, tusaale ahaan inay raadsato amar maxkamadeed oo reebaaya ficilada qaar oo laga dalbado maxkamadda madaniga ah. Booliisku waxay kaloo siinaayaan cinwaano lala xiriiro oo ay leeyihiin ururo wax kaalmeeya, kooxo u dooda, ama adeegyada deegaanka ku yaal oo la magangalo sida taakuleyn dumar (women's aid), kaalmada dhibane (victim support) ama Looyar takhasus u leh xadgudubka guriga ama adeeg kaloo takhasus leh taasoo ku xiran baahiyaha gaarka ah. Ogolaanshaha dhibanaha ayaa loo baahan yahay ka hor inta aanu booliisku gudbin wax macluumaad ah kaalmada dhibane laakiin ururkan waxaa loola xiriiri karaa si toos ah. Booliiska, oo uu wehelinayo adeegga dacwad oogidda, ayaa mas'uul ka ah baaritaanka arinta iyo go'aaminta in la xukumo laga shakisanaha taasoo ku xiran xoogga ay leedahay cadeynta ay haystaan iyo rajada laga qabo in la xukumo.

Maxaa laga filan karaa dammaanada (bail) booliiska?

Booliisku waxay go'aamiyaan in la dammiinto tuhunsanaha inta la sugayo go'aanka dembi oogidda ama goorta ugu horraysa ee uu maxkamadda imanayo. Damiinashadu waxay noqon kartaa mid shuruudo leh ama shuruudo la' waxayna ku xiran tahay duruufaha kiiska, iyo weliba in uu leeyahay iyo in kale xukunno hore oo muhiim ah. Damiinashada ka sokow, waxaa weliba dhici karta in tuhunsanaha lagu hayo xabsi inta la sugayo tagistiisa maxkamadda. Tuhunsaneyaasha la damiinto dembi oogidda ka dib waxaa caadi ahaan loo qabtaa in ay maxkamadda yimaaddaan taariikhda xigta ee bannaan.

Markii dacwadda la dhegaysto maxkamaddu waxay go'aamin doontaa in isdifaacaha la dammiinto, ama in xabsiga lagu sii hayo ilaa dacwad buuxda laga qaadaayo. Haddii maxkamadda la weydiisto in is difaacaha lagu sii hayo xabsiga, waa inay cida denbiga ku raadinaysa is difaacuhu muujiso in dammaanadaasi aanay ku filneyn inay ka hor istaagto is difaacaha in uu ka maqnaado dacwadda xigta ama inuu dhib kale geysto, ama inuu dhibaateeyo markhaatiyaalka, ama in la hubiyo inuu imaan doono dacwad qaadista buuxda.

Kuwan ayaa ka mid ah shuruudaha kala duwan oo maxkamaddu ku soo rogi karto is difaace:

- Waxaa waajib ku ah inaanu la sameyn wax xiriir ah, xiriirkaasi ha ahaado mid dadban ama mid toosan, qofka la magacaabay; iyo/ama
- Waxaa waajib ku ah inaanu gelin meelo gaar ah (khaasatan lagu qeexo mowqifka 'maabada waddooyinka' halkii laga adeegsan lahaa masaafooyinka marka laga soo dhaqaaqo cinwaan gaar ah) tagin meel la magacaabay; iyo/ama
- Waxaa waajib ku ah inuu deganaado oo uu seexdo meel la magacaabay; iyo/ama
- Waxaa waajib ku ah inuu iska soo xaadiriyo saldhig booliis oo la cayimay waqti iyo maalinta loo qabtay; iyo/ama
- Waxaa waajib ku ah in uu baasaboorkiisa keeno saldhig booliis oo magacaaban.

Inkastoo ay isku mid yihiin, shuruudahan waa inaan lagu khaldin amarrada faraxumeyn reebista iyo hanti la wareegista, kuwaasoo aanan si toos ah u lahayn shuruudaha ilaalinta.

Markay maxkamaddu ogolaato damiin, waxay isticmaashaa hab la wada yaqaan oo ay ku diiwaangelinayso go'aanka iyo wixii shuruud ah. Haddii is difaace uu buriyo(jebiyo) shuruudaha ku xusan dammiinkisa, waa la xiri karaa maxkamaduna waxay leedahay awood ay isaga/iyada kusii haysto xabsiga. Marka kiiska danbiilenimo la soo gebagebeeyo, damiinasho ma jirto, markaa wixii hore ee shuruudaha damaanaddu saameyn ma yeelanaayaan. Sidaas daraadeed is difaacuhu ma hoos imanayo xakamayn, marka laga reebo kuwa ka dhalan kara wixii xukun ah ee lagu soo oogo. Ilaalin dheeraad ah ayaa la bixin doonaa haddii amar ka istaagis ah ee lagu bixiyey qodobka 5 ee Sharciga ka ilaalinta Dhibaato ee 1997 ama haddii amar reebaaya ficilada qaar oo madani ah la bixiyey iyadoo la adeegsanaayo Sharciga ka ilaalinta Dhibaato ee 1997 ama Sharciga xeerka Qoyska ee 1996. Qodobka 12 ee Sharciga dhibaataynta qoyska 2004 ayaa beddelaya qodobka 5 waxuuna halkaas gelinayaa qodob cusub oo 5A si loo suurtogeliyo

in ka dib marka qofka denbiga lagu waayo la sameeyo amar xakamayn (sii fiiri si aad faahfaahin u hesho).

Waa maxay doorka adeegga dacwad oogiddu?

Sharciga Caddaaladda Denbiga 2003 ayaa adeegga dacwad oogidda masuuliyad dheeraad ah ka siiyey go'aaminta in tuhunsaneyaasha denbi lagu oogo iyo denbiyada lagu oogayo waxa ay yihiin. Waxaa jira 42 qaybood, kuwaasoo juqraafi ahaan ku toosan qaybaha booliiska iyo Qayb 'aan la taaban karin', CPS Direct , taasoo booliisku ka helo adeeg talobixin denbi oogidda ka hor waqtiyada aan la shaqayn, dalka oo dhan. Mid walba Qaybahaas waxaa jooga xiriiriye heer qaran ah ee dhibaateynta qoyska, kaasoo ku shaqeeyaa nidaam istaraatiji ahaan iyo hawlgal ahaan labadaba ahna dacwad oogaha ugu sarreeya ee kiisaska dhibaataynta qoyska.

Markay booliisku xiraan tuhunsane waa in ay kiiska (marka laga reebo denbiyada aad u yar yar qaarkood) u gudbiyaan looyar ka socda adeegga dacwad oogidda kaasoo go'aamiya inuu kiiska sii wado iyo in kale. Waxaa kiiska dib loogu eegaa iyadoo la raacayo Xeerka u yaalla dacwad oogeyaasha boqortooyada go'aanka dacwad oogiddana waxa lagu saleynayaa laba shardi:

1). Shardi cadeyn ah - waxaa waajib ah inay jirto cadeyn ku filan oo keenaysa saadaal macquul ah oo laga qabo xukimid

Haddii uu badbaade joojiyo inuu taageero dacwad ku oogis, kiiska lagama tanasulo. Marka ay caddayn kale jirto, oo ku filan in ay buuxiso shardiga caddaynta, kiiska waa la sii wadi karaa. Haddii kale markhaati ayaa lagu dirqin karaa inuu yimaado maxkamadda Waxaa taasi la sameeyaa marka dacwad ooge khibrad leh uu kiiska kala fiirsado sarkaalka kiiska. Waxay caadi ahaan sidaas noqotaa marka danta guud ee shacabka loogu baahan yahay dacwad oogid, tusaale ahaan, rabshadda oo kordhaysa, carruur ku jirta ama dhibbane aad iyo aad nugayl u ah.

Haddii ay badbaaddo u sheegto booliska inay rabto inay la noqoto bayaankeedii hore, adeegga dacwad oogidda ayaa weydiista booliiska inay ka qaadaan cadeyn qoraal ah oo ay ku sharaxeyso sababaheeda, iyadoo xaqiijinaysa in caddeymaheedii hore ay run ahaayeen, waxaa kaloo la weydiinaayaa in lagu qasbay inay go'aankan garto. Booliska ayaa iyagana la weydiinaaya fikradooda ku saabsan noqoshadeeda. Haddii laga shakiyo in dhibanaha la saaray cadaadis fara badan si ay uga tanaasusho kiiska, adeegga dacwad oogidda ayaa booliiska weydiista inay arrinta sii baaraan.

2) Shardi danta guud ah - waxuu dacwad ooguhu shardigan u gelayaa oo keliya haddii shardiga caddaynta la buuxiyo.

Waxaa jira arimo dhowr ah oo danta guud ah oo halkan laga tixgelin karo. Waxaa dhammaantood muhiim ah arrimaha ay ka mid yihiin in denbiga hore loo qorsheeyey,

denbiga lagu hor galay, ama lagu ag galay ilme ama ay jiraan sababo loo aaminsan yahay in laga yaabo in denbiga lagu celiyo.

Adeegga dacwad oogiddu waxuu sharci ahaan nuqullo ka heli karaa wixii amarro ama xukunno ah ee laga soo saaro kiisaska qoyska kuwaasoo uga yimaadda qolooyinka kiiska ku jira, sida booliiska ama dhibbanaha. Qoraallada dheeraadka ah sida bayaannada ama warbixinnada, waa in uu adeeggu u helaa rukhsadda maxkamadda qoyska ka hor inta aanan kuwaas la helin ama laga isticmaalin kiisas kale[14].

Marka uu adeegga dacwad oogiddu ogaado wax jebin ah oo lagu sameeyey amaro madani ah, waxuu ka fikiri doonaa sida warbixintaas loo isticmaali karo iyo inay tahay muhiim oo ay dhalinayso culeys dheeraad ah oo loo isticmaalo dacwad ka oogidda kiisaska danbiile.

Kuwan ayaa ah faahfaahino ku saabsan sida adeegga dacwad oogiddu uu dacwad uga oogo kiisaska dhibaateynta qoyska taasoo ku taal siyaasadiisa dib loo habeeyey, oo la daabacay bishii Febraayo 2005[15] (www.cps.gov.uk).

Sidee bay yihiin imaatinka maxkamadda iyo waqtiyada sugitaanku?

Sida kor ku xusan dhibaateyn qoyska intooda badan waxaa xaliya maxkamadha ooga denbiyada yar yar; gabal (qayb) yar ayaa loo soo gudbiyaa maxkamadda sare sida hoos ku faahfaahsan. Waqtiyada sugista dacwo qaadista oo labada maxkamadooda waxay u dhaxeeyaan laba asbuuc ilaa dhowr bilood. Geynta maxkamaddu waxay ku xirnaa doontaa meesha ay ku taal iyo shaqada u taal maxkamadda laakiin waxaa kiiska weliba dib u dhigi kara labada qolo midkood, tusaale ahaan, sababtoo ah diyaargaraynta kiiska, warbixinnada iwm.

Kiis ayaa loo gudbin karaa maxkamadda sare sababo ay ka mid yihiin:

- Haddii u yahay mid laysku soo oogi kari oo keliya (eeg erayada sida xuruufaha loo qoray) ama
- Waxaa weeye xadgudub dhan-walba marka laga eego aan ku habooneyn dacwad kooban ama
- Waxaa weeye xadgudub dhan-walba tuhunsanuhuna uu rabo in dacwadda la geeyo maxkamadda sare ama
- Waxaa weeye xadgudub dhan-walba maxakamadda denbiyada yar yarina ay u aragto inaysan lahayn awood ay ku xukunto.

[14] Fiiri Xeerasha kiisaska qoyska (ee la beddelay) 2005 (kala duwan)

[15] Siyaasadda dacwadda laga oogo kiisaska dhibaataynta qoyska IYO sida go'aannada dacwad oogidda loo gaaro: http://www.cps.gov.uk/publications/docs/DomesticViolencePolicy.pdf IYO http://www.cps.gov.uk/publications/docs/DomesticViolenceLeaflet.pdf

Heer kasta oo ay dacwadaha danbiile marayaan booliiska ayey waajib ku tahay inay la socodsiiyaan ka badbaadaha wixii isbadel ah, gaar ahaan go'aamada khuseeya dammiin ku siideynta. Booliiska ayaa u sheegi doona dhibanaha wixii ku saabsan Taakulaynta Dhibanaha (Victim Support) iyo adeegyada markhaatiga ee laga helo maxkamad kasta ee denbiile. Adeegyada markhaatigu waxay siiyaan macluumaad markhaatiga, dhibanaha, saaxiibadood, iyo qoyskooda ka hor, inta lagu jiro, iyo dacwadda ka dibna. Waxay isku dubaridi kartaa inaad soo booqato maxkamadda ka hor intaan dacwada la qaadin, haddii laga dalbado. Adeeegyada markhaatiyadu waxay ku sharaxan yihiin qoraalka taakulaynta dhibanaha, *Aadista maxkamad (Going to Court)* kaasoo booliisku ay siiyaan markhaatiyada. Booliisku waxay kaloo dhibanaha ku xiriirin karaan ururo taakulayn oo deegaanka ku yaal. Si aad warbixin dheeraad ah u hesho waxaad booqan kartaa Bogga internetka ee Dhibbanaha iyo Markhaatiga HMCS oo ah http://www.hmcourts-service.gov.uk/infoabout/attend/witness/index.htm.

Sidee kiis loo liisgareeyaa?

Qaybta Caddaaladda debiile ee booliska ayaa weydiista dhammaan qaybaha taariikhaha laga fogaanayo (aan lagu aadineynin ballanta) ka hor intaan kiiska loo liisgareyn dacwad dhageysi- sidoo kale telefoonada iyo ciwaanada lagala soo xiriiraayo qaybaha waqti gaaban.

Maxkamdaha yar yar kiisaska waxaa loo liisgareeyaa ballamo gaar ah, iyadoo la siinaayo waqti macquul ah inta u dhaxeysa ogeysiiska bilowga ah ee dacwad dhegaysiga iyo maalinta loo diyaariyey.

Maxkamadda sare kiisaska waxaa loo liisgareeyaa ballamo gaar ah ama waxaa la geliyaa liis horey looga sii digay oo qaata ilaa laba asbuuc. Arinta labaad, qaybaha waxaa laga yaabaa in loo digo dacwadda habeenka ka horeeya ballanta dacwada.

Haddii mid ka mid ah labada qaybood aan lala xiriiri karin, kiiska ballan kale ayaa dib loogu dhigayaa. Markhaatiyaal looma baahna haddii is difaacuhu qirto denbiga ka hor dacwadda. Haddii denbiga la qirto bilowga dacwadda ama gudaheeda, markhaatiyaasha loo yeeray loogama baahan doono in ay sidaas sameeyaan markaas wixii ka dambeeya.

Waa maxay doorka markhaatiyadu?

Sababo ay keenayaan qaabka dhibaateyn qoyska, badanaa dhibaha ayuun baa ah markhaatiga qur ah, sidaas daraadeed, markhaatiga ugu weyn ee dacwadda. Baahida markhaati yimaadda waxaa looga baaqsan karaa oo keliya haddii uu is difaacuhu qirto denbiga, ama haddii ay jirto cadeyn xoogan oo taakulaysa kiiska oo ka imanaaya ilo kale, sida deriska, booliiska, ama shaqaale caafimaad, kuwaasoo la soo hordhigi karo maxkamadda.
Hase yeeshee, caddaynta ugu fiicani waxay ka timaaddaa markhaatiga shakhsi ahaan u yimaadda.

Sida uu dhigayo qodobka 116 ee Sharciga Cadaalaadda Denbiga 2003, dhibbane wuu bixin karaa caddeyn taasoo ah qoraal caddeyn oo dhaari la socoto halkii uu shakhsi ahaan sidaas u sameyn lahaa. Waxaa jira xaalado gaar ah oo qodobkaas loo isticmaali karo, tusaale ahaan, marka dhibbanaha cabsi looga horjoogo in uu yimaaddo ama uusan isagu caddayn odhaah ah bixin karayn sababtoo ah xaaladdiisa jirka ama maskaxda. Waa in ay maxkamaddu weliba ka fikirto in ay danta caddaaladda tahay in bayaanku uu galo halkii caddaynta odhaahda ah

Marar aad u tira yar waxaa la oggolaan karaa bayaanka qofka cabsi awgeed bixin waaya caddayn odhaah ah. Maxkamadda ayaa rukhsayn karta - marka la raaco qodobbada 114-116 ee Sharciga Caddaaladda Denbiga 2003 - in bayaan qoran la oggolaado haddii ay danta caddaaladda tahay in sidaas la sameeyo marka la eego:-

- waxa ku jira; ama

- xaqdarrada loo geysanayo qof kale iyo weliba la'aanta fursad dib loogu su'aalo qofka kaas bixiyey; ama

- in la samayn kari lahaa amar lagu rabo tallaabooyin gaar ah; ama

- duruufihii kalee muhiimka ah.

Maxkamaduhu way dhibsadaan inay ogolaadaan dalbashooyinkan, maxaa yeelay garyaqaanada tuhunsanaha ayaan helayn fursad ay dib ugu su'aalayaan dhibbanaha. Waxaa laga yaabaa in aanan lagu guulaysan dalbashada. Hase yeeshee, Maxkamadda Yurub ayaa caddaysay in mabda'a ugu weyni uu yahay in ay dacwaddu guud ahaan ahayd mid xaq ah.

Laga soo bilaabo July 2002 sharciyo cusub ayaa lasoo saaray, oo la socda sharciyeynta Xeerka Caddeynta Denbiile & Cadaaladda Dhalinyarada 1999, kaasoo lagu dhaqangelin karo dhammaan dhibanayaasha. Kuwani waxay booliiska uga baahan yihiin inay ogaadaan goor hore, markhaatiyada liita iyo kuwa la cabsi geliyey. Tani waxay u saamaxdaa (ogolaataa) adeegga dacwad oogidda inuu kala tashado xaaladda dhibanaha, oo uu go'aamiyo waxa codsi ah ee maxkamaddo looga diranayo wax sharciyo gaar ah si loo kaalmeeyo dhibanaha markii cadeyn la bixinaayo. Sharciyada gaarka ah waxaa ka mid ah: qolol wax lagu sugo oo gooni ah, iyo waxyaalo u fududeynaaya dhibanaha iyo markhaatiyada; inay bixiyaan caddeymo muraayada gadaalkeeda, ama iyadoo la isticmaalaayo TV/fidow (video) ama in loo baneeyo qolka dadweynaha. Si kastaba ha ahaatee, waa in la xusuustaa in sharciyada gaarka ah ee la codsado oo/ama la bixiyo ay ku xirnaan doonaan nooca markhaatiga ee arrinka ku jira iyo nooca kiiska. Shax koobeysa sharciyadaas ayaad ka helaysaa lifaaqa B.

Maxaa laga filan karaa denbi ku helis?

Maalintii 7dii Diisembar 2006dii, Guddiga Xeerasha Xukumidda ayaa soo saaray xeerar kama dambays ah oo ku saabsan Mabda'yada Ugu weyn; Dhibaataynta Qoyska[16] *iyo Jebinta Amarka Ilaalinta*[17]*.*

Si tuhunsanaha loogu helo xadgudub denbiilenimo, guddiga kiiska go'aaminaayaa (jury) ama qaadiyada denbiyada yar yar/qaaddiga waxaa waajib ku ah inay hubiyaan denbiilenimada is difaacaha " si ka fog wax shaki ah" intii ay wax ku xukmi lahaayeen "dheelitirka ixtimaal" sida ka dhacda maxkamadaha madiga ah. Haddii aanay ku qanacsanayn hubitaankooda in uu tuhunsanuhu denbiga geystey, ma lahaan karaan war ikhtiyaar ah oo aan ahayn inay siidaayaan is difaacaha.

Haddii tuhunsanuhu uu qirto ama lagu helo denbiga ka dib dacwadda, xukumista suurtagalka ahi ee lagu soo rogi karaa way kala duwan yihiin aragti ahaan. Ganaaxyada denbiile waxay xoogga saaraan baxnaaninta tuhunsanaha waxay weliba horjoogsadaan denbi galidda dheeraadka ah ee mustaqbalka. Marka kuwaas la barbardhigo, daawaynta diyaarka u ah kiisaska madaniga ah waxaa marka ugu horraysa loogu talagalay in ay ilaaliyaan dhibbanaha.

Maxkamadaha denbiyada yar yar waxaa u yaalla fursado xukumis oo kaladuwan laga bilaabo sii-daynta buuxda ama mid shuruudo leh, ilaa ganaaxyada iyo amarrada ganaaxa beeleed ilaa xabsiga. Xukunnada xabsigu waxay noqon karaan kuwo islamarkaaba hirgalaya ama goor dambe hirgalaya waxaana dhici karta in xukumidda taariikhda dambe laga dhigo si loo fiiriyo in uu tuhunsanuhu addeeco halka ama dhowrka shuruudood ee ay maxkamaddu dejiso. Isagoo ah amar siyaado ku ah xukunnada kor ku xusan, waxay maxkamadaha denbiyada yar yari weliba tuhunsane ku amri karaan (taasoo ku xiran karaankiisa) in uu magdhaw siiyo qolada la dhaawacay.

Amarka ganaaxa beeleed waa amar maxkamadeed oo ka kooban ugu hal ama dhowr ka mid ah shuruudaha soo socda:

- Shardiga shaqo aan mushaar lahayn;
- Shardiga waxqabad;
- Shardiga barnaamij laga qaybgalo (xataa barnaamij wax lagaga qabanayo akhlaaqda denbiilenimada ee keenaysa dhibaataynta qoyska);
- Shardiga waxqabad mamnuuc ah;
- Shardiga bandoo;
- Shardiga bixid;
- Shardiga degganaanshaha;
- Shardiga daawaynta caafimaadka maskaxda;
- Shardiga ka baxnaaninta mukhaadaraadka;
- Shardiga daawaynta khamriga la xiriirta;

[16] http://www.sentencing-guidelines.gov.uk/docs/domestic_violence.pdf
[17] http://www.sentencing-guidelines.gov.uk/docs/breach_of_protective_order.pdf

- Shardiga kormeerista;
- Shardiga xarunta la isugu yimaaddo (haddii uu tuhunsanuhu 25 jir ka yar yahay)

Barnaamijyada Denbiileyaasha

Degaanka kaste ee adeegga carbinta ee England iyo Wales waxaa laga wadaa barnaamij denbiile oo la aqoonsan yahay. Waxaa barnaamijyadaas loogu talagalay denbiileyaasha ragga weyn ah ee denbi lagu xukumo, kuwaasoo xadgudub u geysta lammaanahooda gaarka ah ee dumarka ah, inkastoo denbiileyaasha qaybtani ayan dhammaantood ku habboonaan doonin barnaamijyada sababo kaladuwan awgood. Waxay barnaamijyadu ku socdaan qaabka aasaasiga ah ee soo socda:

- Baaritaanka halista iyo maamulka halista oo ay hay'aduhu iska kaashadaan, taasoo ka kooban nidaamyo warbixinta lagula wadaagayo booliiska iyo hay'adaha kale ee muhiimka ah.

- La xiriirka dhibbaneyaasha la og yahay iyo lammaaneyaasha cusub ee ragga laga aqbalo barnaamijka si loo hubiyo in ay qabaan rajooyin macquul ah, si loo dhiirrigeliyo qorshaynta badbaadada ee macquulka ah, si warbixin looga siiyo barnaamijka looguna baaqo iyaga in ay gacan ka geystaan qiimeynta barnaamijka.

- Maamulka camaliga ah ee denbiilaha uu ku sameeyo maamulaha kormeeraya denbiiluhu si maxkamadda dhakhso loogu celin karo mararka uu kaasi maqnaado; la xiriirka firfircoon ee booliiska iyo Hawlwadeenka Badbaadada Dumarka; samaynta kulanno nidaam ku dhisan oo fool-ka-fool ah.

- Kulannada shaqada kooxeed oo lala yeesho denbiilaha.

Biloowgii 2006/07da, dhammaan Barnaamijyada la aqoonsan yahay ee Denbiileyaasha Xadgudubka Guriga ee ku jira Nidaamka Caddaaladda Denbigu waxay buuxinayeen xeerarka tayada ee Guddiga Aqoonsiga Adeegyada Ganaaxidda (CSAP) markii ugu horraysayna, Adeegga Qaran ee Maamulka Denbiilaha (NOMS) ayaa bartilmaameedyo u dhigay dhammaystirka barnaamijyada.

Maxkamadaha Khibradda u leh Dhibaataynta Qoyska

Marka aannu kiis u gudbinayno Maxkamadda khibradda u leh dhibaataynta qoyska (SDVC), waxa aan u gudbinaynaa ma aha oo keliya dhisme ama maamul maxkamadeed, laakiinse waa hab khibrad loo leeyahay oo maxkamadaha denbiyada yar yar dhexdooda lagu xallinayo kiisaska dhibaataynta qoyska. Guud ahaan, maxkamadaha denbiga ee khibradda u leh dhibaataynta qoysku waxay ku shaqeeyaan ama:

- Ururin: dhammaan kiisaska dhibaataynta qoyska waxaa la isugu keenaa fadhi maxkamadeed oo keliya kaasoo lagu xallinayo arrimo kaladuwan - beddelaadda damiinashada, qirashada ama diidista denbiga, dib u eegidda dacwadda ka hor, warbixinnada xukunka ka hor, iyo

xukumista. Maxkamadaha ururinta qaarkood waxaa weliba lagu dhegeystaa dacwado laga yeelanayo kulanno gaar u ah dhibaataynta qoyska; ama

- Deddejinta: waxaa mudnaanta la siiyaa kiisaska dhibaataynta qoyska iyadoo kulanno gaar ah oo ka mid ah barnaamijka maxkamadda sida, waqtiyada maxkamadda 4tiiba 1 loo qoondeeyo dhibaataynta qoyska dacwadaheeda dheeraadka ah.

Hase yeeshee, waxaa muhiim ah in la ogaado in maxkamadaha khibradda u leh dhibaataynta qoysku ay yihiin barta ugu sarraysa ee laga bixiyo hawlaha taageerada ee laga helo hay'adaha qaanuuniga iyo samafalka ah ee xaafadda. Waxaa kuwaas ugu muhiimsan diyaarsanaanta la taliyaal dhibaatayn qoys oo madaxbannaan (IDVA) kuwaasoo taageeradaas bixinaya. Ka sokow diyaarsanaanta adeegyada qareenimada, shariigyada kale ee qayb ku leh horumarinta iyo taageeridda maxkamadaha khibradda leh waxaa ka mid ah: Booliiska, adeegyada bulshada, guryeynta, adeegga dacwad oogidda, Adeegga Carbinta. Ururka Daryeelka Aasaasiga ah, Xarunta gurmadka degdegga ah, Takhaatiirta Guud. Waxaa weliba lagu talinayaa in la diyaariyo shaqaale huran, lana tababbaray.

Maxkamadaha khibradda leh 7dii ugu horraysay, West London (Galbeedka London), Cardiff, Derby, Wolverhampton, Caerphilly, Croydon, Leeds, waxaa loo qiimeeyey si madaxbannaan[18]. Faa'iidooyinka waxaa ka mid ahaa:

- Waxqabadka aadka u fiican ee maxkamadda iyo adeegyada taageerada ee loogu talagalay dhibbaneyaasha;
- Wadaagga warbixinta oo roon;
- Kalsoonida shacabka iyo ka qaybqaadashada dhibbanaha oo korodhsan;
- Dhibbanaha oo bartamaha laga geliyo hawsha la qabanayo.

Sawirista degdegga ah ee macluumaadka adeegga dacwad oogidda ee la qabtay Diisembar 2005tii waxaa weliba lagu muujiyey in kiisaska soo mara maxkamadaha khibradda u leh dhibaataynta qoyska qiyaas ahaan 71% dacwad oogiddooda laga gaaray guul marka la barbar dhigo qiyaasta qaran ee 59% ah. Iyagoo adeegsanaya naatijooyinkaas fiican ee qiimaynta, Adeegga Maxkamadaha ee Boqortooyada, Wasaaradda Gudaha iyo Adeegga dacwad oogiddu waxay soo saareen barnaamij kaasoo qiimaynta loogu baahiyey dhammaan maxkamadaha denbiyada yar yar iyo Xafiisyada Dawladda. Maxkamadaha iyo iskaashiyada xaafadda ayaa loogu baaqay in ay soo sheegaan haddii ay rabaan in ay sameeyaan maxkamad khibrad u leh dhibaataynta qoyska. Nidaam is-baaris ayaa sal u noqday baarista 'diyaarsanaanta' xaafadaha iyo addeecidda lagu eegayo qodobbo dhowr ah. Qodobbada waxaa dhigay Koox Hawleed oo ka kooban daneeyaal muhiim ah ee laantaas waxaana lagu daray Buugga Ilaha. Asalka Barnaamijka Maxkamadaha Khibradda u leh Dhibaataynta Qoyska, Buugga Ilaha iyo tusaalooyinka Ururinta Macluumaadka waxaa fiirintooda loo sii mari karaa bogga internetka ee Dhimista Denbiyada oo ah:
http://www.crimereduction.gov.uk/domesticviolence/domesticviolence59.pdf

[18] Warbixinnada waxaa laga heli karaa internetka halkan
http://www.cps.gov.uk/publications/docs/specialistdvcourts.pdf;
http://www.cps.gov.uk/publications/docs/dvpilotsites0405.pdf; iyo
http://www.cps.gov.uk/publications/docs/eval_dv_pilots_04-05.pdf

Laga bilaabo Abriil 2007da waxaa England iyo Wales ka jiri doona 64 goobood oo ay ka hawlgalaan Maxkamadaha Khibradda u leh Dhibaataynta Qoyska.

Maxkamadaha Dhibaataynta Qoyska ee Midaysan

Markii kan la daabacayey, Croydon waxay dhexda ugu jirtay tijaabintii sanadka ahayd ee Maxkamaddii Dhibaataynta Qoyska ee Midaysan ee ugu horraysay (IDVC). Waxaa tijaabinta la qiimayn doonaa xilliga dayrta/jiilaalka 2007da isagoo uu barbar socdo mashruuc qiimayn oo lagu cabbirayo saamaynta qodobbada Sharciga guri ku dhibaataynta, denbiga iyo dhibbaneyaasha 2004.

Sifada ugu weyn ee maxkamadda dhibaataynta qoyska ee midaysan waxa weeyaan kiisaska denbiyeed iyo qoyseedba ee khuseeya qoys keliya, markaasoo ay dhibaataynta qoysku tahay arrin, in iyaga lagu hor dhegeysan doono isla Qaadi keliya markastoo ay suurogal tahay - sida kuwa ka jira Maraykanka.

Ereyga IDVC fududnaantiisa ayaa loo isticmaalayaa - kiisaska waxaa lagu dhegeysanayaa maamullada Maxkamadaha denbiyada yar yar iyo arrimaha qoyska hoostooda - maxkamad cusub ma aha.

Mabda'yada iyo ujeeddooyinka Tijaabinta Croydon ayaa loogu malaynayaa in tallaabo lagu qaadi doono oo keliya sharciga hadda dejisan, iyo in go'aannada maxkamadeed lagu gaari doono marka kiis kaste loo eego xaqiiqooyinka:

- Hal qoys, hal Qaadi markastoo suurogal ah, iyo iyadoo la adeegsanayo sharciga iyo nidaam xaq ah.
- Kiiska denbiyeed waa in la dhammaystiro , oo laga gaaro ugu yaaraan barta xukunka ama denbi ku waayidda, ka hor inta uusan isla Qaadigaasi dhegeysan kiiska qoyseed.
- Nidaamka la adeegsado si kiiska looga dhegeysto maxkamadda dhibaataynta qoyska ee midaysan waa in uusan dib u dhac u keenin kuwa iyagu ku jira.
- Wadaagga warbixinta ee waxtarka leh ayaa lagu gaari karaa go'aanno lagu badbaadayo oo waxtar leh

SHARCIGA KA ILAALINTA DHIBAATADA 1997 (Danbi galid)

Faa'iidada ugu wayn ee xeerkan waa faa'iidadiisa uu u leeyahay dumarka aan la deganeyn ku xadgudbahooda, aanna u dhalin wax caruur ah. Xeerka ka ilaalinta dhibaatad ee 1997 waa daaweyn saameyn leh wuxuuna u yahay dhibanayaasha aan raadsan karin ilaalin marka la eego Sharciga xeerka qoyska ee 1996 sababtoo ah ma soo buuxin karaan shuruudaha adag ee looga baahan yahay dalbadaha ee ku sharaxan xeerkaas (eeg lifaaqa A iyo qaybta koowaad ee hagahan).

Dacwadaha denbiile ee xeerka ka ilaalinta dhibaatada ee 1997 waxay keeni kartaa denbi ku helis iyo amar mamnuucis ah, laakiin ma saameyn karto wax amarro ah oo ku saabsan xuquuqda hanti.

Xeerkani wuxuu soo saaray laba fal danbiyeed: dhibaatayn denbiilenimo (marka la eego qeybta 2aad) iyo ka baqidda rabshada (marka la eego qaybta 4aad). Dhibaatayn denbiilenimo waxaa la oran karaa inay tahay dhibaato kooban waxaa lagu qaadaa maxkamadda denbiyada yar yar. Ka baqidda rabsho waxaa loo arki karaa inay tahay dhibaato kooban waxaana la marin karaa maxkamadda denbiyada yar yar, ama marka denbiga lagu oogo maxkamadda sare.

- Qeybta 2: marka la eego qeybtan qofna waa inaanu geysan wax ficil ah, kaasoo dhibaya qof kale (ama dad kale) oo uu garanayo (yaqaan) ama uu garan doono, dhibka qof kale gaaraya, kaasoo ah haddii u jiraba, 'qof macquul ahi' oo haysta isla macluumaadkaas, uu u arko dhaqankaas dhibaataynta qof kale (ama dad kale). Ujeeddooyinka Sharcigan awgood, qofka habdhaqankiisa laga shakisan yahay waa in uu ogaado in uu kaasi yahay dhibaato haddii qof caqli ama waxgarad leh oo isla warbixintaas haystaa uu uu habdhaqankaas u arki lahaa dhibaato. Waa inuu dhibkaasi dhacaa ugu yaraan laba goor oo ah heer "wax qabad la raaco". Waxaa dacwadda qodobkan la marin karaa oo keliya maxkamadda denbiyada yar yar.

- Qaybta 4: marka la eego qeybtan qof hab dhaqameedkiisu ku abuuro cabsi qof kale, ugu yaraan laba goor rabshadaa waxaa loo isticmaali doonaa, wuxuuna denbiile, haddii uu ogyahay, ama uu ogaan karo, in tani ay dhalinayso cabsi mar kastoo ka mid mararkaas u timaadda qofka kale. Waxaa sidoo kale halkan laga isticmaalayaa tijaabinta 'waxgaradka' ee lagu adeegsanayo qodobka 2. Waxaa denbigan dacwaddiisa la marin karaa ama Maxkamadda denbiyada yar yar ama ta sare.

Booliiska waxay leeyihiin awood ay ku xiraan kuna eedeeyaan, qof walba oo ay uga shakiyaan inuu ku kacaayo mid ka mid ah labada denbi ee kor ku xusan iyo mid ay kiiska ugu gudbiyaan Adeegga dacwad oogidda si go'aan looga gaaro dacwad oogidda.

SHARCIGA GURI KU DHIBAATAYNTA, DENBIGA IYO DHIBBANEYAASHA 2004

Laga bilaabo July 2007da, qodobka 12 ee Sharciga dhibaataynta qoyska 2004 ayaa beddelaya qodobka 5 ee Sharciga ka ilaalinta dhibaatada 1997 waxuuna halkaas gelinayaa qodob cusub oo 5A si maxkamadaha loogu kordhiyo awoodda si ay amarro xakamayn u dejin karaan marka ay denbi ka xukun bixinayaan. Welibana waxuu qof kastoo ku magacaaban amarka xakamaynta xaq u siin doonaa in laga matalo maxkamadda haddii la soo gudbiyo codsi lagu beddelayo ama lagu tirtirayo amarka.

Waxuu qodobkaasi weliba maxkamadaha u bilaabaya in ay awoodaan in ay amarro xakamayn dejiyaan - kuwaasoo denbi kaste khuseeya - marka tuhunsanaha hore dacwad loo mariyey ama denbi lagu waayey. Waqtiga xaadirka ah, amarrada xakamayntu waxay u diyaar yihiin uun marka tuhunsane lagu xukumo sida ay dhigayaan qodobbada 2 ama 4 ee Sharciga ka ilaalinta dhibaatada ama dhibaatayn ama rabshad qof u cabsi gelin. Waxay ujeeddadu tahay in lagu xalliyo xaaladda imanaysa marka kiiska denbiile uu ku dambeeyo denbi ku waayid ee ay laakiinse weli muuqato marka la eego duruufaha kiiska

in uu dhibbanuhu u baahan yahay ilaalin loo sii wado. Waxaa dhab ahaan u furan dhibbanaha in uu raadsado amar horjoogsanaya faraxumaynta ama mid reebitaan oo uu ka helo maxkamadda madaniga. Hase yeeshee, tallaabada taas ka camali ah ayaan ka hortagayn uun dib u dhaca iman kara iyo korodhka kharashka soo gaara miisaaniyadda gargaarka sharciga, waxayse weliba dhibbanaha siinaysaa ilaalin sii waxqabad fiican.

Denbi ku waayidda ka bacdi, waxay maxkamaddu ugu baaqi kartaa dhinaca dembi oogidda iyo dhinaca difaaca labadaba in ay soo bandhigaan wixii ah caddayn dheeraad ah ee aanan laga aqbali karin dacwadaha denbiyeed laakiinse laga oggolaan karo dacwadaha madani. Iyadoo adeegsanaysa caddayntaas, waxay maxkamaddu go'aan ka gaari doonta in loo baahan yahay amar si dhibbanaha looga ilaaliyo dhibaatada. Haddii kale, waxay maxkamaddu go'aankaas gaari kartaa iyadoo isticmaalaysa caddaynta hore loogu soo bandhigay dacwadda denbiyeed. (Tusaale ahaan, qof ayaa lagu waayi karaa denbiga waxyeellada jirka ee daran laakiinse waxaa dhici karta in uusan muran ka jirin in uu qofkaasi xoog u garaacay albaabka isagoo ku qaylinaya hanjabaad oo uu xoog ku galay aqalka.)

Ujeeddada laga leeyahay amarka xakamayntu waxay noqon doontaa mid ka hortag ah, oo aan ganaaxid ahayn – tallaabo qofka lagaga ilaalinayo dhibaatada. Waxaannu aaminsan nahay in ay jiraan xaalado keenaya in ay dhibbaneyaashu ilaalin ama badbaadin degdegga ah u baahan yihiin, xataa inkastoo aanan la hayn caddayn ku filan in qofka denbiga lagu xukumo. Marka ay ka fiirsanayso in ay amar samayso waxay maxkamaddu tixgelin doontaa isla su'aasha ay maxkamad madani u tixgelin lahayd codsiga amarka xakamaynta marka la raaco qodobka 3 ee Sharciga ka ilaalinta dhibaatada, taasoo ah miyaa amar loo baahan yahay si dhibaatada qofka looga ilaaliyo? Su'aashaasi waa mid ku xiran aragtida maxkamadda.

Marka ay ka fiirsanayaan in la caddeeyey eedaymaha gaarka ah ee habdhaqan xun oo hore, waxay maxkamaduhu adeegsan doonaan xeerka madani ee caddaynta. Hase yeeshee, sida ku cad sharciga kiiseed ee loo adeegsaday amarrada noocaas ah (amarrada akhlaaqda bulshada u daran iyo amarrada mamnuuca ee kubbadda cagta) xeerka madani ee dabbakhmayaa waxuu ku xirnaan doonaa nooca kiiska, iyo xataa heerka xumaanta habdhaqanka lagu eedaynayo iyo nooca wixii ganaax ah ee lagu xukumi karo.

Sharciga dhibaataynta qoyska 2004 ayaa weliba qof kastoo ku magacaaban amarka xakamaynta xaq u siinaya in "la maqlo", tusaale ahaan la matalo, haddii la soo gudbiyo codsi lagu beddelayo ama lagu tirtirayo amarka. Xeerasha u yaalla Maxkamadda ayaa maxkamadda waajib kaga dhigi doona in qof kastoo ku magacaaban amarka xakamaynta ay ka wargeliso codsiga noocaas ah si uu qofkaasi hore u sii ogaan karo waxa dhacaya, si markaasna uu fursad ugu helo in uu codsiga kaga doodo maxkamadda dhexdeeda.

QAYBTA IV - WIXII QODOBBO KALE KHUSEEYA

SHARCIGA GURYAHA ee 1996

Sharcigani waa hab dadban (in direct) oo lagu ilaalinaayo dhibbaneyaasha dhibku ka soo gaaray guri ku dhibaateyn, maxaa yeelay waxay ku tirsan tahay qof saddexaad - milkiilaha gurigooda - dalbdasho hanti soo celin. Milkiile guri - ama haddii la sii cadeeyo dawladda hoose, ama milkiile bulsho- ayaa isticmaali kara sharcigan haddii lala soo socodsiiyo, ama lagu soo oogay inuu kireyste-guri (tenant) dhibaataynaayo guri-kireysti kale.

Bulsho xalinta dhibkan ahi waxay ku xiran tahay guri-deganaha ay haysato rabshada qoyska oo ka taga guriga isagoo rabin inuu dib ugu soo laabto, sidaa daraadeed waa hab fudud oo mulkiiluhu uu kaga soo ceshanaayo hantidiisa (gurigiisa) xadgudbaha markaa degan guriga. Awood uma siinayso dhibanaha ay soo gaareen dhibaateyn qoys inuu guriga sii deganaado. Mana uu bixinaayo wax ilaalin ah oo ahaan karta amar maxkamadi bixiso oo reebaaya ficilada qaar oo uu meel kale ku bixinaayo.

QORSHOOYINKA MEESHA LAGU MAGAN GALO

Qorshaha meesha lagu magan galo waa tallaabo cusub oo wax lagaga qabanayo ka hortagga guri beelka. Waxuu ku deeqaya hawlo ammaanka la xiriira oo si xirfadle loo hirgeliyo si dadka la kulma dhibaataynta qoyska loogu fasaxo in ay ku sii jiraan gurigooda, marka ay taas nabad ku samayn karaan, marka ay iyagu doortaan iyo marka uusan denbiiluhu iminka ku noolayn guriga.

Hagista Golaha loo wadan dhan yahay ee London (LGA) iyo bulshooyinka iyo Dawladda Hoose waxay ujeeddadeedu tahay in masuuliyiinta hoose iyo daneeyaasha kalee muhiimka ah laga caawiyo in ay aasaasaan oo ay si fiican u wadaan qorshooyin loogu talagalay in lagu caawiyo dhibbaneyaasha dhibaataynta qoyska.

Hagista waxaa laga heli karaa oo keliya internetka:
http://www.communities.gov.uk/index.asp?id=1502478

SHARCIGA HAAJIRAADDA IYO SANDUUQYADA DAWLADDA

Waxaa jira qiyaas ahaan 500 oo dumar ah sanadkii, oo la siin doono oggolaansho ay ku soo galaan Ingiriiska si ay u guursadaan qof dhalashada Ingiriiska haysta iyadoo lagu xirayo shardiga ah in ayan isticmaali karin sanduuqyada dawladda. Sanduuqyada dawladda waxaa halkan looga jeedaa lacagaha bulshada la siiyo, tusaale ahaan kaalmada ijaarka (housing benefit).

Marka laga hadlayo dhibbaneyaasha dhibaataynta qoyska, Xeerasha Haajiraadda ayaa iyaga u fasaxaya in ay magacooda ku dalbadaan sharciga degganaanshaha joogtada ah, iyadoo uu taas la socdo shardi caddaymeed oo gaar ah oo loo baahan yahay si kaas loo

siiyo. Hase yeeshee, inta codsiga laga fiirsanayo, sharcigooda haajiraadda ee hore ayaa u diidaya in ay helaan deeq guryeynta la xiriirta. Haddii ayan haysan meel ay ku nabad galaan ama wax ay isku taageeraan, waxaa dumarkaas badi khasab ku noqon karta in ay ku noqdaan gurigooda halkaasoo ay kala kulmaan xadgudub dheeraad ah iyo, mararka aad iyo aadka u daran, dil.

Masuuliyiinta dawladda hoose ayaa u baahan in ay xasuusnaadaan in dhibbaneyaasha dhibaataynta qoyska qaarkood ay si gaar ah ugu baahan karaan daryeel iyo taxaddar loo muujiyo oo/ama ay yeelan karaan carruur ku tiirsan, taasoo u qalmin karta in la caawiyo marka la raaco qodobka 47 ee Sharciga Adeegga Qaran ee Caafimaadka (NHS) iyo Daryeelka Bulshada, Sharciga Dawladda Hoose qod 2, Sharciga Carruurta 1989 ama sharci kaloo muhiim ah marka kiisba kiis loo eego.

Sanadkii 1999kii, waxaa la soo saaray qodob rukhsaynaya in degganaansho loogu oggolaado dadka iyagu ka soo tagay lammaanahooda ama xaaska ama ninka ku xadgudbayey intii ay ku jireen muddadooda tijaabinta, ee welibana denbi maxkamadi ku xukuntay ama wax la mid ah ku caddayn kara in uu xiriirku ku joogsaday dhibaataynta qoyska awgeed.

Noofembar 2002dii, noocyaha daliilka ee lagu caddayn karo dhibaataynta waa la kordhiyey. Inkastoo uu amar, denbi ku xukun ama digniin booliis ay yihiin caddaynta ugu fiican, warbixinta Takhtarka Guud, bayaan maxkamadeed, iyo warbixin booliis oo ku saabsan tegidda, warqad ka socota adeegyada bulsheed, ama warqad taageero oo ka socota goob hoy siin ayaa sidoo kale looga dhigay wax la aqbali karo.

Agaasinka Haajiraadda iyo Dhalashada ayaa gooni u saaraya kiisaskaas oona deddejinaya, dhawaanna, codsadeyaasha waxaa laga dhaafay nidaamka kharaashyada ee cusub, haddii ay diihaalsan yihiin.

Waxaa la wadaa tallaabooyin cusub oo lagu wanaajinayo hawsha codsashada iyo helitaanka caddaynta, taasoo uu ku jiro nidaam waxqabad oo loo dejinayo hay'adaha, iyadoo la ballaarinayo macnaha iyo turjumaadda ereyga 'hoy siin'. Abriil 2007da waxaa jiri doona foom codsasho oo cusub[19] kaasoo qoraallo hagid ahi ay la socdaan.

SHARCIGA DIB U HABAYNTA BOOLIISKA 2002 - DHIBAATAYNTA QOYSKA IYO CAAFIMAADKA

Adeegga caafimaadka qaran (NHS) waxaa laga sugayaa in uu caawimo gaar ah ka bixiyo dhibaataynta qoyska, sababta oo aan ahayn oo keliya saamaynta caafimaadka dhibbaneyaasha, laakiinse weliba sababtoo ah in Adeegga caafimaadka qaran uu noqon karo barta ugu horraysa ee lagula xiriiri karo shaqaale garan kara waxna ka qaban kara xaaladda.

[19] xogwaraysiga dhibaataynta qoyska ee hadda:
http://www.ind.homeoffice.gov.uk/6353/11406/dvquestionnaire.pdf

Taas daraaddeed, Ururrada Daryeelka Aasaasiga ah (PCT) ee England ayaa noqday masuuliyiin xil laga siiyey iskaashiyada denbiga iyo qalalaasaha dhexdooda laga soo bilaabo 30kii Abriil 2004tii. (Sharciga taas muhiimka u ahi waa qodobka 5 (1) ee Sharciga Denbiga iyo Qalalaasaha 1998, kaasoo uu wax ka beddelay Sharciga Dib u habaynta Booliiska 2002).

Waxay taasi ka dhigan tahay in ururrada daryeelka aasaasiga ah ay iminka u tahay masuuliyad qaanuuni ah in ay la shaqeeyaan masuuliyiinta kale ee u xilsaaran waxkaqabadka dhibaatooyinka denbiga iyo qalalaasaha iyo isticmaalka mukhaadaraadka ee xaafadda.

SHARCIGA TACLIINTA 2002

Dugsiyadu waxay noqon karaan tallaabada ugu horraysa ee lagu soo ogaan karo dhibaataynta qoyska iyo xadgudubka loo geysto ardayda, waxayna kiisaska u gudbin karaan adeegyada bulshada. Marka uu dugsi ku tuhunsan yahay in arday uu dhibbane u yahay xadgudub ama uu halis ugu jiro xadgudub, ama haddii uu aaminsan yahay in ay jiraan dhibaatooyin xagga qoyska ah, waa in uu raaco nidaamyada xaafadda u yaalla ee uu kaga warbixin karo walaaca uu qabo. Qodobka 175 ee Sharciga Tacliinta 2002 ayaa hubin doona in ururrada maamulka iyo Masuuliyiinta Tacliinta ee Xaafaddu ay haystaan oo ay diyaar u yihiin nidaamyo habboon oo ay ilmaha ku ilaalin karaan ama ku badbaadin karaan.

LIFAAQA A: YUU YAHAY QOF WAX LA WADAAGA?

Wixii ku saabsan amarada hanti la wareegista (qayb 62(3) Sharciga xeerka qoyska 1996)

- Ay is qabaan ama ay horay isu qabi jireen, ama ah ama ahaa Lammaane Madani.
- Ay wada nool yihiin ama horay u wada noolaan jireen (laga soo bilaabo Diisembar 2005tii Qodobka 3 ee Sharciga guri ku dhibaataynta, denbiga iyo dhibbaneyaasha ayaa beddelaya qodobka 62(1)(a) ee Sharciga xeerka qoyska 1996 si loogu daro lammaaneyaasha isku jinsiga ah)
- Ay ku wada nool yihiin ama ku wada noolaan jireen hal guri, sababo aan aheyn ama ka baxsan , inuu qof mid ka mid ihi yahay mid u shaqeeya kan kale, guri kireyste, marti ama saarane.
- Ay yihiin qaraabo (macnaha "qaraabo" waxaa lagu ballaariyey Sharciga xeerka qoyska 1996 si loogu daro inaadeerrada rumaad)
- Ay ku heshiiyeen inay is guursadaan (heshiiskaas ha laga noqdo ama yaan laga noqon)
- Ay isla galeen heshiis lammaan madani (sida ku qeexan qodobka 73 ee Sharciga lammaanta madani 2004) (haddii heshiiskaasi joogsaday iyo haddii kaleba);
- Wixii la xiriira wixii ilmo ah, in labada qofba ay yihiin ama waalid ama ay hayaan masuuliyadda waalidnimada ama ay hore u hayeen - waxuu qofku hoosgeliyaa qeybtan haddii:
  1) Uu yahay waalidiinka ilamaha ; ama
  2) Ay saaran tahay iyada/isaga ma'uuliyadda ilamaha.
- Ay yihiin qeybo ka mid ah qoyska dacwadiidsu socoto (marka laga reebo qaybta IV ee Sharciga Qoyska 1996).

Wixii ku saabsan amaro faraxumeyn reebis ah (Sharciga FLA 1996)

Dalab waa la sameyn karaa haddii uu dacwad lagu soo ooguhu uu soo hoosgelaayo mid ka mid ah noocyadan soo socda:

a)
Wax la wadaaga dalbadaha:
- Xaas
- Xaas hore
- La degane (la nool)
- Horay ula noolaan jirey
- Lammaanaha Madani
- Lammaanihii Madani ee hore

b)
Wax la wadaaga, nooc walba oo ah qof ku jira a):
- Aabbe

- Hooyo
- Adeer hooyo qaba
- Eeddo aabbe qabo
- Wiilkaaga
- Gabadhaada
- Gabar uu dhalay/ ay dhashay ninkaaga/xaaskaaga.
- Wiil uu dhalay/ ay dhashay ninkaaga/xaaskaaga.
- Ayeeyo
- Awoowe
- Wiil ayeeyo/awoowe loo yahay
- Gabar ayeeyo/awoowe loo yahay
- Walaal (wiil ah)
- Walaal (gabar ah)
- Walaal (gabar/wiil) ay dhashay hooyadaa/ uu dhalay aabahaa
- Adeer, abti
- Eeddo, habaryar
- Gabar uu dhalay walaalkaa/ ay dhashay walaashaa
- Wiil uu dhalay walaalkaa/ ay dhashay walaashaa
- Inaadeerro rumaad

c)
wax la wadaaga qof ku jira b):
- Xaas
- Xaas hore
- La degane (la nool)
- Horay ula noolaan jirey
- Lammaanaha Madani
- Lammaanihii Madani ee hore

d)
- Qof kula deggan ama kula deganaan jirey guriga.

e)
- Qof uu dalbaduhu kula heshiiyey inuu guursado, ama uu la galay heshiis lammaan madani; oo heshiiskii laga baxay muddo ku siman 3 sano.

f)
- Haddii uu dalbaduhu yahay waalidka ilmaha ama ay ka saaran tahay mas'uuliyad waalidnimo ilmaha, waalid kale ama qof kale oo ay saaran tahay mas'uuliyad waalidnimo.

g)
- Haddii ilmaha loo korsaday sidii mid aad dhasahay oo kale, ama loo ogolaaday in la korsado:
  i) waalidkii dhalay, ama waalidkii dhalay waalidkaa , uu ku lug leeeyahay;

ii) ilmaha ama waalidka ilmaha korsanaya, ama qof dalbaday inuu korsado, ama qof ilmaha damcay inuu mar uun korsado.

Qof walba oo ku yira i) ayaa dalban karaa amar kaasoo uu ka dalban karo qof ku jira qaybta ii)

h)

- qayb kale oo ka tirsan qoyska.

FIIRO GAAR AH (NB): Shuruudaha loo isticmaalo in lagu go'aamiyo yaa dalban kara amar marka la eego qaybta IV ee Sharciga xeerka Qoyska ee 1996 sida kor ka muuqata way yare balaaran tahay. Guud ahaan, haddii ka badbaadaha rabshado qoys uu wax la wadaago xadgudbahaas, xeerkan waxaa loo isticmaali karaa xalin daaweyn ahaan. Si kastaba ha ahaatee sharcigan looma isticmaali karo haddii aanu ka badbaaduhu weligii la noolaan xadgudbaha, aanay xaaskiisa ahaan jirin, ama aanay wax caruur ah u dhalin xadgudbahaas.

LIFAAQA B: SHARCIYO GAAR AH OO LOOGU TALO GALAY MARKHAATIYAAL LIITA IYO KUWA LA CABSI GELIYEY

Shaxdan hoos ka muuqataa waxay faahfaahineysaa sharciyada gaarka ah oo la socdey Xeerka Caddeynta Danbiilenimada iyo Cadaaladda Dhalinyarada (1999 (YJCE).

Nadaam gaar ah	Tixraaca Sharciga 1999 YJCE	Qodobka 16 markhaatiyaasha (carruurta iyo dadka waaweyn ee nuglan)	section	Qodobka 17 markhaatiyaasha (cabsigelin/cabsi ama saxariir
Markhaatiga oo laga qariyey danbiilaha	s.23	Diyaarsanaan buuxda		Diyaarsanaan buuxda
Caddeyn lagu dhiibay iyadoo la isticmaalaayo, xiriir toos ah	S.24	Diyaarsanaan buuxda		Diyaarsanaan buuxda
Cadeyn si gaar ah loo bixiyey	s.25	Diyaarsanaan buuxda		Diyaarsanaan buuxda
Siibista koofiyadda iyo canbuurka	s.26	Maxkamadda sare uun		Maxkamadda sare uun
Cadeyn fidow lagu soo duubay	s.27	Ka diyaar ah Maxkamadda sare laakiin qayb ahaan ka diyaar ah maxakamadaha denbiyada yar yar – carruurta markhaatiga ah ee u baahan ilaalo gaar ah qayb ahaan **uun** ugu diyaar ah – xaafadaha tijaabinta uun		MA AHA diyaar, marka laga reebo Maxkamadaha sare ee Wood Green iyo Sheffield
Baaris dhexdhexaadiye loo sii marayo	s.29			KUMA habboona
Kaalmo xagga xiriirinta	s.30	Diyaarsanaan buuxda		KUMA habboona

Inkastoo ayan ahayn qodobbo dhab ahaan gaar ah, qod34-40 ee Xeerka Caddeynta Danbiilenimada iyo Cadaaladda Dhalinyarada 1999 (YJCEA) waxaa kaloo ku jira awoodo dhibbaneyaasha iyo markhaatiyaasha looga ilaalinayo dib u su'aalidda eedaysanaha oo iskii u hadlaya.

Gaar ahaan, qod38 ee Sharcigaas ayaa dhigaya in ay maxkamadaha waajib ku tahay in ay eedaysanaha siiyaan waqti ku filan si uu u qabsado wakiil dib ugu su'aala dhibbanaha. Haddii dhammaadka muddadaas uusan qofna qabsan, waa in ay maxkamaddu ka fikirto in ay habboon tahay in ay magacawdo wakiil dib u su'aala dhibbanaha isagoo matalaya eedaysanaha. Lacagta wakiilku waa in ay markaas ka timaaddo Sanduuqyada Dhexe.

LIFAAQA C: ERAYO ADEEGSI TAXAN

WAQTIGA GAABAN
Waqtiyada xaddidan ee caadi ahaan u yaalla gaarsiinta ogeysiiska dacwadda waa la soo ‘gaabin’ karaa, la soo koobi karaa, gaar ahaan marka laga hadlayo codsiyada amarrada degganaanshaha waxaana kiiska dacwad loo keeni karaa si ka degdeg badan sida caadiga ah. Waa in uu codsaduhu weli muujiyo in danbiilaha laga wargeliyey codsiga keeni kara amar isaga lagaga saaro guriga qoyska. Waxaa talo ah in ay ka suurogal badan in ay maxkamaddu amarka noocaas ah bixiso haddii ay heshay fursad ay ku maqasho labada qof.

DAMMIIN
Siideynta ay boolisku siidaayaan ama maxkamadda ay siideyso eedaysane ilaa taariikh, waqti iyo goob gaar ah. Shuruudo ayaa lagu xiri karaa dammiinashada, tusaale ahaan in uusan geysan denbiyo ama uu ka maqnaado/ka baxsanaado meel gaar ah.

ILAALINTA XASILOONIDA (in nabad la ilaaliyo)
Ilaalin xasilooni waxaa lagu dalban karaa codsi (ama cabasho) ama maxkamadda ayaaba dalban karta. Qofka si fiican ilaalinta xasiilonida u raba waxuu ku ballanqaadayaa in uu habdhaqan fiican la yimaaddo waxuuna ku heshiinayaa (isagoo saxiixaya dukumeenti) in uu nabadda ilaaliyo muddo waqti oo go’an. Haddii uu qofkaasi sidaas samayn waayo waxaa lagu amri karaa in uu bixiyo qayb ahaan ama gebi ahaan lacag ay maxkamaddu ku goysay amarkii ugu horreeyey.

AMAR DARYEELIS XANAANEYN AH
Amar hoos imanaaya Sharciga Caruurta ee 1989, kaasoo ilmaha lagu hoos geynaayo daryeelka dawladda hoose. Dalab waxaa sameyn kara dawladda hoose oo keliya, NSPCC ama qof uu awood siiyey wasiir. Maxkamaddu waxay leedahay awood ay ku sameyso amar daryeelis xanaaneyn haddii ay ku qanacdo inuu ilmahaasi dayacan yahay dhibaato hayso, ama uu dhib halis ugu jiro, waxyeelo muuqata. Mararka qaar waxay sababtu noqon kartaa waalidka oo sameeyey wax ay ku waxyeellaynayaan carruurtooda ama taas u oggolaaday qof kale in uu sameeyo. Waxaa taas ka mid ah waxyeellada jirka ama xadgudubka galmeed ee la geysto. Waxyeellada jirka iyo xadgudubka galmada labaduba waxay geysan karaan waxyeello shucuureed. (Qodobka 31 ee Sharciga Carruurta 1989).

ARJI DALBASHO (MADANI AH)
Qoraal sharci ah oo sharaxaaya faafaahinta daaweynta uu dalbaduhu doonaayo. Arjigu wuxuu xanbaarsanaan karaa waxyaalo gaar ah oo dalabka ah, oo ay ka mid yihiin macluumaad hore sida taariikhaha iyo goobaha dhacdooyinka kiiska ku saabsan. Haddii kuwani aanay la socon arjiga waa loo soo gudbin karaa maxkamadda ilaa 14 cisho ka dib markii kiiska loo soo gudbiyey maxkamadda.

U GO’ID DHAGAYSI DACWAD (MADANI AH)
go’aan iyadoo la raadinaayo amar qof xabsiga lagu dhigo. Inta badan waxaa la dalbadaa markuu qofkaasi geystay fal maxkamad sharaf ka qaadis ah, tusaale ahaa

inuu u hogaansami waayo amarka maxkamadda.

SIIDEYN SHURUUDI KU XIRAN TAHAY

Xadgudbe ayaa laga siideyn karaa xabsiga ilaa saddex sano ah. Shardigu waxaa weeye in iyada/isagu aanay geli karin denbi kale mudadaas. Siideytu ka dib way buri (dhammaan). Haddii uu denbi cusub galo inta lagu jiro waqtigaas ay maxkamaddu u qabatay xadgudbaha waxaa lagu xukumi karaa denbiga cusub kaas oo uu geystay intii siideynta shuruuda ah ay jirtey. Denbiiluhu wuxuu markaa filan karaa labo xukun midka cusub iyo kii hore. Siideynta shuruudi ku xiran tahay waxay tahay denbi ku helis.

WAXQABAD XIRIIR (SHARCIGA CARRUURTA IYO KORINTA ILMO AADAN DHALIN 2006)

Waxqabadka Xiriirku waa kulan warbixineed, barnaamij, fasal, kulan caqlicelin ama hagis ama waxqabad kaloo qofka ka caawin kara in uu ilmaha la samaysto, u ilaaliyo ama u wanaajiyo xiriirka. Kani waa wax ku cusub caawinta waalidka marka ay kala tageen ama is fureen oo ayan ku heshiin karin nidaamka ay u diyaarin karaan carruurtooda. Waxay waalidku dacwaddooda u soo gudbin karaan maxkamadda qoyska si ay taasi go'aan uga gaarto. Kiisaska maxkamadda intooda ugu badan ee khuseeya carruurtu waxay ka kooban yihiin muranno ama dacwado khaas ah oo dhexmara waalidka kuwaasoo ku saabsan arrimaha degganaanshaha iyo xiriirka. Kuwaasoo sidoo kale loogu yaqaanno 'haynta' ama 'helitaanka'. (Qodobka 8 Sharciga Carruurta 1989 kaasoo uu wax ka beddelay Sharciga Carruurta iyo Korinta ilmo aadan dhalin 2006.)

MAXKAMAD U HOGAANSAN LA'AAN

U hogaansamid la'aan go'aan, ama nidaam maxkamadeed, tusaale ahaan, jebinta amar faraxumeyn reebaaya waxaa weeye maxkamad sharaf ka qaadis. Amarka marka la gaaraAyo (denbiilaha) ayaa looga digaa inuu xabsi halis ugu jiro hadduu maxkamadda sharafta ka qaado, amase uu u hogaansami waayo amarka, taasoo caddeyneyso in ogeysiin ganaax ay la socoto.

ADEEGGA DACWAD OOGIDDA EE BOQORTOOYADA

Adeegga dacwad oogiddu waa maamul dacwad oogid oo dawli ah kaasoo ka madax banaan booliska laakiin iyaga la shaqeeya maadaama ay qayb ka yihiin kooxda dacwad oogidda. Adeegga dacwad oogiddu waxuu denbiyo iyo dacwad ku oogaa dadka England iyo Wales. Waxaa kaloo uu booliska kala taliyaa dacwad oogidda suurto galka ah; waxuu maxkamadda u soo diyaariyaa kiisaska; kiisaska dacwad kaga oogaa maxkamadaha denbiyada yar yar iyo maxakamadaha sare; waxuuna ku amraa qareennada in ay kiisaska dacwad kaga oogaan maxkamadda sare iyo kuwa ka sarreeya.

"DHAN KASTABA "

Waxaa loola jeedaa kiis loo qaadi karo dhan walba ama dhan walba oo denbiga ah. Tan macnaheedu waxaa weeye kiiska waxaa lagu qaadi karaa maxkamadda denbiyada yar yar ama maxkamadda sare. Maxkamadda denbiyada yar yar ayaa kiiska u diri karta maxkamadda sare si loogu dhegeysto, Adeegga dacwad oogidda ayaa codsan kara in kiiska lagu dhegeysto maxkamadda sare ama tuhunsanaha ayaa dooran kara in lagu dacweeyo maxkamadda sare.

AMAR ILMO BADBAADIN DEG DEG AH
Amar la sameeyey iyadoo la eegaayo Sharciga Caruurta ee 1989 kaasoo siiya dawladda hoose ama qof qaanuunku u fasaxay xaqa ay ugu wareejin karaan ilmo deegaan ku haboon ama u horjoogsan karaan ka saaristiisa isbitaal, iwm. ugu badnaan 8 cisho, haddii ay jirto sabab macquul ah oo lagu rumaysan karo inuu ilmuhu dhibban yahay, ama uu halis ugu jiro dhibaato muuqata in amarkaa la sameeyo ma ahane. Amarkaasi waxuu noqon karaa tallaabada ugu horraysa ee lagu gaari karayo Amar Daryeelis oo ka sii joogto ah (kor eeg). Waxaa kaloo ay maxkamaddu soo saari kartaa amar qofka uu ku habboon yahay lagaga fogaynayo aqalka ilmuhu ku nool yahay ama loogu diidayo in uu galo meel go'an oo loo diiddan yahay taasoo ku hareeraysan guriga ilmaha. (Qodobbada 44 iyo 44A Sharciga Carruurta 1989)

DANI UGU JIRTO HAL DHINAC – eeg AAN LASOO WARGELIN

LA TALIYAHA MADAXBANNAAN EE DHIBAATAYNTA QOYSKA
Adeegyada la taliyaha madaxbannaan ee dhibaataynta qoysku waxay ku xiran yihiin maxkamadda xaafadda ee khibrad u leh dhibaataynta qoyska (eeg weliba maxkamadda khibrad u leh dhibaataynta qoyska) waxayna dhibbaneyaasha ka caawiyaan hawsha maxkamadda iyo la xiriirka hay'ado kaladuwan oo qaanuuni iyo samafal ah.

DENBI LAYSKU EEDAYN KARO UUN
Denbi dacwad lagu qaadi karo iyadoo la adeegsanaayo denbi-eedeyn uun, taasoo macnaheedu yahay waxaa denbigaa oogaya guddiga go'aan gaarista ee maxkamadda, denbiyada ugu Khatarsan (dil, kufsi) waa laysku eedeyn karaa uun. Hase yeeshee, waxay kiisaskaasi dhammaantood ka bilaabmi doonaan maxkamadda denbiyada yar yar waxaana islamarkaaba loo gudbin doonaa maxkamadda sare si dhegeysi hore loogu sameeyo.

AMAR REEBAAYA SAMEYNTA FICILADA QAAR (INJUNCTION)
Daweyn ah hab amar maxkamadeed oo loola jeedo qof gaar ah taasoo ka mamnuuceysa inuu sameeyo, ama sii wado inuu sameeyo, ficil uun, ama ku amreysa inuu sameeyo ficil uun.

MAXKAMADAHA DHIBAATAYNTA QOYSKA EE MIDAYSAN
Waxay tani ku salaysan tahay "hal qaaddi oo halkii qoys" u dhegeysta kiisaska denbiyeed iyo qoyseed labadaba, iyadoo la isku dayayo in ayan dadku u baahan in ay sheekadooda ku ceshaan in ka badan hal jeer. Tijaabinta ugu horraysa ee nidaamka maxkamadda midaysan waxuu saldhiggeedu yahay maxkamadda denbiyada yar yar ee Croydon [waxay bilaabantay Oktoobar 2006dii].

DALBASHO LACAG LAGU BIXINAAYO/MID AAN LAGU BIXINEYNIN
Dalbasho lacag lagu bixinaayo waa dalab lagu dalbanaayo dhaawac cadad lacag ah oo go'an tusaale ahaan 1000 Gini. Dalbasho aan lacag lagu bixineynin waa dalab lagu dalbanaayo dhaawac cadad lacag ah oo go'an, tusaale ahaan aan ka badneyn 10,000 oo Gini. Qaaliga (judge) dacwadda dhegaysanaaya ayaa go'amin doona lacagta la bixin doono.

AMAR FARAXUMEYN REEBIS AH
Amar hoos imanaaya Sharciga xeerka Qoyska ee 1996 kaasoo ka reebaaya qof, inuu toos ahaan ama si aan toos ahayn u faraxumeeyo qof wax la wadaaga ama ilme ku xiran, ama dhinaca kale sameyn wax ay maxkamaddu ku amartay inaanu sameyn.

DALBASHO LA WARGELIYEY
Dalbasho ay maxkamaddu u liis gareeysay in la qaado, kaasoo la wargelinaayo dhammaan qaybaha iyadoo loo sheegaayo taariikhda iyo waqtiga dacwadda.

OGEYSIIS GANAAX
Ogeysiis lagu lifaaqo amarada maxkamadda madaniga ah, kaasoo uga digaaya qayb ama qaybaha haddii ay u hogaansami waayaan amarka, qaybo gaar ah oo amarka ka mid ah, waxay sharafta ka qaadayaan maxkamadda, waxaana loo dirayaa xabsiga. Ogeysiis ganaax waa ballanqaad ku saabsan amarada faraxumeyn reebis, laakiin ka gooni ah amarada kale. Haddii dalbade (dhibane) uu dareemo in denbiile (xadgudbe) uu yaraysto ama uu jebiyo ogeysiis ganaax, halkaasoo awoodda wax lagu xiro ay ku lifaaqneyd, dalbaduhu uma baahna inuu maxkamadda aado si uu u weydiisto in denbiilaha lasoo xiro maadaama ay booliisku xiri karaan iyagoon haysan amarka ay maxkamaddu bixiso si qof loo xiro.

BARNAAMIJYADA DENBIILEYAASHA
Barnaamijyada denbiileyaasha waxaa ugu badnaan loogu talagalay in lagu caawiyo ragga si ay u beddelaan habdhaqankooda oo ay u samaystaan xiriirro ixtiraam leh, oo xadgudub ka maqan yahay. Maadaama, cabbir ahaan, denbiileyaasha intooda ugu badan ay yihiin rag, barnaamijyada denbiileyaasha intooda ugu badan waxay la shaqeeyaan ragga. Waxay barnaamijyadu caadi ahaan ka kooban yihiin kooxo yar yar oo 8 ilaa 15 rag ah oo dhibaato ama xadgudub ku beeray xiriir hadda joogto ah ama hore.

AWOOD WAX XIRIS
Awoodda ku lifaaqan amarada faraxumeyn reebista [ilaa 1da July 2007da] ama hanti la wareegista, kaasoo awood u siinaaya booliiska inay wax xiraan, iyadoon la heysan amarada ay maxkamadi bixiso oo wax lagu xiro, qof ay ku haystaan sabab macquul ah oo looga shakisan yahay inuu jebiyey amar ay awooddaasi ku lifaaqneyd, in kastoo qofkaasi aanu sameyneynin fal danbiyeed. Khasab ma aha in lagu lifaaqo awoodda wax xirista amar faraxumeyn, ama mid hanti la wareegis wixii ka dambeeyana 1da July 2007da, awoodda xirista laguma lifaaqi doono amarka horjoogsanaya faraxumaynta. Hase yeeshee, waqtiga xaadirka ah, waa in ay maxkamaddu awoodda xirista ku lifaaqdo haddii ay u muuqato in uu eedaysanuhu dhibaatayn u geystey ama ugu hanjabay codsadaha ama ilme ku xiran, haddii aysan maxkamaddu ku faraxsanayn in duruufta kiiska dhammaantood marka la eego ay codsadaha ama ilmuhu si habboon u badbaadsanaan doonaan. Faa'iidadu waxaa weeye, haddii lagu lifaaqo awoodda wax xiridda, dalbaduhu uma baahna inuu maxkamadda aado si uu u weydiisto denbiilaha in lasoo xiro maadaama ay booliisku xiri karaan isaga iyagoo haysan amarka ay maxkamaddu bixiso si qof loo xiro.

NADAAMIN KIIS
Qof awood la siiyey oo ah sarkaal ka shaqeeya maxkamadda oo mas'uul ka ah inuu geeyo dikumintiyada sharciga dadka- badanaa denbiilaha ama is difaacaha.

DAMMIIN KU SIIDEYN/SII KU HAYN
Xirid qof lasoo eedeeyey ama siideyntiisa iyadoo lagu siideynaayo dammiin. Haddii laga shakisanaha lasii hayo waxaa lagu xirayaa xabsiga deegaankaas ilaa goorta dambe ee uu maxkamadda hor imanayo.

MAXKAMADDA KHIBRADDA U LEH DHIBAATAYNTA QOYSKA
Goob khibrad leh oo laga sameeyo maxkamad denbiyo yar yar oo sii jirta halkaasoo laga bixiyo tababbar gaar ah oo loogu talagalay nidaamka caddaaladda iyo shaqaalaha iyo weliba taageero waxtar leh oo loogu talagalay dhibbaneyaasha. Waxaa England iyo Wales ka jiri doona 64 goobood oo noocaas ah bisha Abriil 2007da.

TALLAABOOYINKA / TAS-HIILAADKA GAARKA AH
Awoodo ama tas-hiilaad dheeraad ah oo loogu talagalay in lagu ilaaliyo dhibbaneyaasha. Waxaa kuwaas ka mid noqon kara qolol sugitaan oo gooni ah, markhaati furid lagu sameeyo deyr dabadii ama xiriir fidiyow, iwm taasoo ku xiran nooca maxkamadda. Marwalba weydiiso wixii diyaar ah ee aad heli karto.

DHIBAATO KOOBAN (yar)
Denbi si kooban uun loo qaadi karo, oo macnaheedu yahay waxaa lagu qaadayaa maxkamadda denbiyada yar yar halkii guddii go'aan gaaris ah. Siday u badan tahay waa denbiyo yar yar (tusaale ahaan dagaal iyo sakhradda iyo qalaalasaha) ayaa ah dhibaato kooban

QOF MAS'UUL KA AH QOF KALE WAXQABADKIIS
Ballanqaad lacag ama waxqabad haddii uu mid ku guuleysan waayo inuu bixiyo ama wax qabto. Ballanaadkaa waxaa bixiya shirkado bixiya lacagaha la soo amaahdo iyagoo ku bixinaaya dulsaar (interest) go'an, kaasoo muujiya inuu ka bixinaayo lacag, xanaaneeye, maamule, ama qandaraasle dhismo. Inta badan heshiisyada ballanqaadku waxay u baahan yihiin inuu qofka doonayaa in wax laga bixiyo in uu marka hore isku dayo inuu ka helo waxqabad qofka mas'uulka ka ah, ama waxa jira.

AMARRADA DADKA KALE
Qodobka 60 ee Qaybta IV ee Sharciga xeerka qoyska 1996 ayaa ka hadlaya 'amarrada dadka kale'. Waxuu qodobkaasi Wasiirka Caddaaladda u awood siinayaa in uu qof qeexan, ama dad nooc ah, u fasaxo in ay u doodaan ama matalaan dhibbaneyaasha dhibaataynta qoyska marka ay rabaan in ay helaan amarrada degganaanshaha ama kuwa horjoogsanaya faraxumaynta. Hase yeeshee, Qodobka 60 iminka ma hirgalo, mana jiro qorshe kaas lagu hirgelinayo mustaqbalka dhow.

AAN LA WARGELININ (horay loogu yiqiin "mid dani ugu jirto hal dhinac")
Dalab ay sameyso hal qayb in maxkamadda in la bilaabo iyadoo ay qaybta kale maqan tahay (badanaa waxaa lagu qaadaa iyadoo la eegaayo Sharciga xeerka Qoyska

1996) sababtuna waa dedejinta dalbashada si loo ilaaliyo dalbadaha.

LIFAAQA D: ILAHA TIXRAACA IYO DARAASOOYIN DHEERAAD AH

ACPO Nidaamka War isdhaafsiga Booliiska-Qoyska:

- Nidaamka Ogaysiiska Sharraxaadda ah (sida looga isticmaalay mashaariicda tijaabinta ah iyadoo ay la socdaan nidaamka waxqabadka iyo foomamku) http://www.dca.gov.uk/family/metpol-expmem.pdf;
- Nuskhadda Adeegga Booliiska London
  http://www.dca.gov.uk/family/metpol-protocol.pdf;
- Nuskhadda Qaybta Waqooyi (oo loogu talagalay xaafadaha ka baxsan London/Adeegga booliska London) [fadlan ha eegin halka lagu odhanayo in baaxaddeedu tahay 90 bog – waxay ka kooban tahay waa 11 bog oo keliya]
  http://www.dca.gov.uk/family/metpol-northerncircuit.pdf;
- Jawaabta Caadiga ah iyo Foomamka Codsiga – Lifaaqyada B iyo C:
  http://www.dca.gov.uk/family/stdreq-form-annexb.doc
  http://www.dca.gov.uk/family/stdpol-replyform-annexc.doc
- Warbixinta Qiimaynta (daabacaddeedu waxay weli tira yar uga diyaar tahay oo laga heli karaa Adeegga Maxkamadaha ee Boqortooyada (HMCS)):
  http://www.dca.gov.uk/family/police-info-family-proceedings.pdf

Si aad dukumeentiyadaas uga aragto bogga internetka ee HMCS riix:
http://www.hmcourts-service.gov.uk/infoabout/family_law/index.htm

Tag qaybta odhanaysa 'Part IV of the Family Law Act 1996' waxaa iminka jira isku xire ku yaalla sanduuqa dhanka midig xiga ee odhanaya ‘Further Information’ kaasoo la yiraahdo ‘Domestic Violence Guidance and Information' – waxuu kaasi kuu gudbin doonaa bogga DCA.

Broken Rainbow: Taageerada loogu talagalay dumarka isku taga, ragga isku taga, dadka lab iyo dheddigba u taga iyo dadka jinsigooda beddelay (LGBT) ee la kulma dhibaataynta qoyska. **KHADKA CAAWINTA** 08452 60 44 60
Isniinta ilaa Jimcaha 9ka subaxnimo−1da duhurnimo iyo 2da duhurnimo−5ta galabnimo
Waxaa jooga shaqaale ah dadkaas LGBT.
http://www.broken-rainbow.org.uk/

CAADA – Waxqabadka Midaysan ee Looga hortagayo Xadgudubka Guriga
[hore u ahaa CRARG http://www.crarg.org.uk/index.html]
info@caada.org.uk Tel: 01749 812968
U dadaalaya sidii loo dhigi lahaa jawaab joogto ah, xirfad iyo waxtar leh oo la siiyo dhammaan ka badbaadeyaasha dhibaataynta qoyska iyo gaar ahaan kuwa halista sare ku jira, iyadoo loo sii marayo adeegyo si toos ah loo siiyo mashaariicda qareenimada, shariigyadooda hay’adaha badan ah ee xaafadda iyo weliba iyadoo loo sii marayo wadashaqayn lala yeesho deeq bixiyeyaasha, la taliyeyaasha siyaasadda iyo dawladda.

Xeerasha Xafiiska Wasiirrada ee wax looga qabanayo dhibaataynta qoyska ee ka dhacda goobta shaqada
http://www.civilservice.gov.uk/management/domestic_violence/publications/doc/empl_leaf_21oct04.doc
http://www.civilservice.gov.uk/management/domestic_violence/publications/doc/domestic-violence_lm_leaf.doc

Bogga internetka ee maalgelinta tooska ah ee adeegyada maxkamadeed ee beesha: ‘ www.clsdirect.org.uk. Waxaa bogga ku jira xisaabiye u qalmis waxaana laga heli karaa buugyareyaal uu ka mid yahay mid la yiraahdo “Domestic Violence, abuse and harassment” (Dhibaataynta qoyska, xadgudubka iyo dhibaatada) iyo kuwa kaloo ku saabsan mawduucyo taas la xiriira sida furniinka iyo kala tagga ama kala guurka.

Isutagga Shirkadeed ee ka soo Horjeeda Dhibaataynta Qoyska: Koox ka kooban shirkado hormood ah iyo ururro gooni iyo wadajir ugu dadaalaya waxkaqabadka saamaynta dhibaataynta qoysku ay ku leedahay goobta shaqada.
http://www.corporateallianceuk.com/home.asp

Lacagaha Maxkamadda: Miyaad u baahan tahay in aad bixiso (Court Fees: Do you have to pay them?) – buugyaraha Adeegga Maxkamadda EX160A. EX 160 - foomka codsiga cafinta ama soo celinta.
(qoraal) http://www.hmcourts-service.gov.uk/HMCSCourtFinder/GetLeaflet.do?court_leaflets_id=172
(codsi) http://www.hmcourts-service.gov.uk/HMCSCourtFinder/GetForm.do?court_forms_id=168

Bogga internetka ee Adeegga Dacwad oogidda ee Boqortooyada
www.cps.gov.uk

- Buugyaraha Adeegga Dacwad oogidda ee Boqortooyada (Febraayo 2005) *Policy for Prosecuting Cases of Domestic Violence (Siyaasadda ku toosan Sida looga Dacwad oogo Kiisaska Dhibaataynta Qoyska)*, http://www.cps.gov.uk/publications/docs/DomesticViolencePolicy.pdf
- *How Prosecution Decisions are Reached (Sida looga Go’aan Gaaro Dacwad oogidda)* http://www.cps.gov.uk/publications/docs/DomesticViolenceLeaflet.pdf

Dealing with cases of Forced Marriage – Guidance for Education Professionals (Waxkaqabadka kiisaska Guurka Khasabka ah – Hagista Shaqaalaha Tacliinta)
http://www.fco.gov.uk/Files/kfile/Dealing%20with%20cases%20of%20Forced%20Marriages.pdf

Dealing with cases of Forced Marriage – Guidance for Police. (Waxkaqabadka kiisaska Guurka Khasabka ah – Hagista Booliiska)
http://www.fco.gov.uk/Files/kfile/InteractiveForcedMarriage091106.pdf

Bogga internetka ee Waaxda Arrimaha Dastuuriga ah (Department for Constitutional Affairs) www.dca.gov.uk

Department of Health, Responding to Domestic Violence a handbook for health professionals (Waaxda Caafimaadka, Ka jawaabista Dhibaataynta Qoyska buugyare loogu talagalay shaqaalaha caafimaadka), 2005: http://www.dh.gov.uk/assetRoot/04/12/66/19/04126619.pdf

Domestic Violence ***Law and Practice (Dhibaataynta Qoyska Sharciga iyo Habdhaqanka)***, (**Daabacaadda Shanaad** 200**6**) [Qaaddiga Degmada] Roger Bird [**ISBN: 0 85308 974 4**]

DYN – Khadka caawinta Xadgudubka Guriga ee loogu talagalay ragga Wales
www.dynproject.org/
029 2048 9500 – Cardiff keliya / 0808 801 0321 – wixii ka baxsan Cardiff
Mashruuca Dyn waxuu adeeg qorshayn badbaado iyo qareenimo oo sir ah u soo bandhigaa ragga iyagu la kulmay xadgudub guri. Waxuu mashruucu la shaqeeyaa ragga khaniiska ah, lab iyo dheddigba u taga, jinsigooda beddelay iyo kuwa dumarka uun u taga ee ku nool Cardiff iyo Wales dhammaanteed waxuuna bixin karaa adeegyo iyo ilo kala duwan oo uu ku caawin karo ragga ku jira xiriirro xadgudub leh. Waxaa kuwaas ka mid ah warbixin, talosiin iyo helitaanka adeegyo taageero oo kaladuwan.

Cuntubka Guurka Khasabka ah
xiriirka 0207 008 0151 www.fco.gov.uk
Cuntubka Guurka Khasabka ah waa bar keliya oo talobixin iyo gargaar sir ah ay ka heli karaan kuwa iyagu halis ugu jira in lagu khasbo guur dalka dibaddiisa ka dhaca.

Bogga internetka ee Adeegga Maxkamadaha ee Boqortooyada (HM Courts Service) – www.hmcourts-service.gov.uk

Bogga internetka ee Wasaaradda Gudaha (Home Office) www.homeoffice.gov.uk
Buugyaraha: ***You don't have to live in fear ... (Uma Baahnid in Aad Cabsi ku Noolaatid ...)*** http://www.crimereduction.gov.uk/isp21.pdf

IMKAAN **http://www.imkaan.org.uk/pub/index.php?id=8**
Bayaanka Hawsha: In la bixiyo qareenimo istaraatiiji ah iyo taageero urureed oo gaar ah oo la siiyo hoyyada u adeega baahiyaha dumarka iyo carruurta Aasiyanka ah ee la kulma dhibaataynta qoyska.

Adeegga Talobixinta Haajiraadda (Immigration Advice Service) - 020 7357 6917 / www.iasuk.org

Family Law Protocol (Nidaamka Xeerka Qoyska) daabacaadda 2aad ee Ururka Sharciga (Law Society)
http://www.lawsociety.org.uk/search/view=query.law#

Bogga internetka ee maalgelinta adeegyada maxkamadeed ee beesha
www.legalservices.gov.uk

- miiska u qalmista
  http://www.legalservices.gov.uk/civil/whatis_calculator.asp
- Xeerka Maalgelinta
  www.legalservices.gov.uk/civil/guidance/funding_code.asp

Khadka Talosiinta Ragga www.mensadviceline.org.uk. Khadka caawinta 0808 801 0327

Qorshaha Fidinta iyo Warbixinta ee Qaran
http://www.crimereduction.gov.uk/domesticviolence/domesticviolence51.pdf

Khadka caawinta Qaran ee Dhibaataynta Qoyska 0808 2000 247
Fiiri weliba WAFE, bogagga internetka ee Hoysiinta

Northern Ireland Regional Forum on Domestic Violence, Ending the Pain and Healing the Hurt – *A Practical Guide for Faith Communities Responding to Domestic Violence (*Golaha Degmeed ee Waqooyiga Ireland ee Dhibaataynta Qoyska, Joojinta Xanuunka iyo Daawaynta Dhaawaca – *Hage Camali ah oo loogu talagalay Bulshooyinka Diineed ee ka Jawaabaya Dhibaataynta Qoyska)*, Oktoobar 1999 [Gargaarka Dumarka ee Waqooyiga Ireland]

Northern Ireland Strategy (Xeeladda Waqooyiga Ireland) [Febraayo 2006]
www.nio.gov.uk

Waxkaqabadka Dhibaataynta guriga

Gargaarka Dumarka ee Waqooyiga Ireland / Khadka caawinta 0800 917 1414
www.niwaf.org

Refuge (Hoysiin) **www.refuge.gov.uk**

Guddiga qaxootida 020 7346 6777 www.refugeecouncil.org.uk

***Resolution (Xallinta)* - ugu horraysa xeerka qoyska** **www.resolution.org.uk**
Hore u ahaa Ururka Xeerka Qoyska ee Looyarrada **khad toos: 01689 899 585**

RESPECT (Ixtiraam)
0845 122 8609 www.respect.uk.net
Respect waa ururka xubineed ee Ingiriiska ee barnaamijyada denbiileyaasha dhibaataynta qoyska iyo adeegyada taageerada ee la xiriira. Waxaa inta ugu badan xoogga la saaraa kordhinta badbaadada kuwa soo mara dhibaataynta qoyska iyadoo la abaabulayo hawlgallo waxtar leh oo loo sameeyo denbiileyaasha.

Xuquuqda Dumarka **http://www.rightsofwomen.org.uk/**
Foomka dalbashada tilmaanbixiyaha amarka reebitaanka ah
http://www.rightsofwomen.org.uk/pdfs/dv_2nd_ed.pdf

- Khadka Talobixinta Sharciga ee Bilaashka ah oo ay dumarku ka helaan dumar kale: 020 7251 6577
  Furan Talaadda, Arbacada iyo Khamiista 2–4ta galabnimo / 7–9ka fiidnimo: Jimcaha, 12–2da duhurnimo.
- Khadka Talobixinta Sharciga ee Bilaashka ah ee ku saabsan Dhibaataynta Galmada la xiriirta oo ay dumarku ka helaan dumar kale: 020 7251 8887
  Furan Isniinta 11ka subaxnimo-1da duhurnimo iyo Talaaddada 10ka subaxnimo-12ka duhurnimo.

Southall Black Sisters (Walaalaha gabdhaha ah ee Madoow ee Southall)
www.southallblacksisters.org.uk/
Tel: 020 8571 9595 southallblacksisters@btconnect.com

Bogga internetka ee Taageerada Dhibbanaha (Victim Support)
www.victimsupport.org.uk
Buugyaraha Adeegga Markhaatida ee Taageerada Dhibbanaha, *Going to Court (Tagidda Maxkamadda)*
http://www.victimsupport.org.uk/vs_england_wales/coping_with_crime/criminal_justice_system/going_to_court_leaflet.pdf

Gargaarka Dumarka Wales / Khadka caawinta ee Xadgudubka guriga
Khadka caawinta: 808 8010 800 **www.welshwomensaid.org**
Gargaarka Dumarka Wales waa ururka ugu sita bixinta adeegyada gaar ahaan loogu talagalay in lagu caawiyo dumarka iyo carruurta nugaylka ah ee la kulma dhibaataynta qoyska iyo xadgudubka guriga Wales gudaheeda. Gargaarka Dumarka Wales waa ururka qaran ee ay soo hoosgalaan iyagoo xubin ka ah 35 urur oo gargaarka dumarka ah ee xaafadeed oo Wales ku baahsan.

Gargaarka Dumarka www.womensaid.org.uk
Waxaa kaas soo raaca warbixin laga helo khadka caawinta, goob hoysiin iyo xiriirro laga dalbado buugyareyaasha

Dhallinyarta iyo dadka waaweyn ee nugaylka ah ee ku socda guur khasab ah. Hagista camaliga ah ee loogu talagalay hawlwadeennada bulsheed:
http://www.fco.gov.uk/Files/kfile/Forced%20Marriage%20Guidelines%20for%20social%20workers.pdf